# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

## Kal-fadhiga 29aad

## Fadhiyadii 18aad 19aad iyo 20aad

**27, 28 iyo 29 December 2015**

**Fadhigu Wuxuu furmey 9:54 AM**

**Gudoomiyaha:-** Baashe Maxamed Faarax

**Quraan:- Xildibaan Obsiiye**

**Ajendaha Fadhiga: -** Dooda Odoroska Miisaaniyada 2016ka.

**Gudoomiyaha:-** Maanta waxaynu u balansaneyn dooda Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee sanadka 2016ka, markaa waxaynu bilaabaneynaa dooda waxaana ku soo dhoweynayaa xildhibaan Maxamed Jaamac Cabdi.

1. **Md. Maxamed Jaamac Cabdi**:-(18min 31sec) Bismilaahi, Mudane Sharafta leh, Shir-gudoonka iyo Martida ASC, Mudanayaal waxaan ileeyahey aad kalmad ka tidhaahdid Miisaaniyada 2016ka ina hortaal iyo soo jeedinta Gudidda Dhaqaaluhu Golaha u soo gudbiyeen oo runtii ay ka muuqato dal-dalooyin faro badan rag badan oo aqoon lihina uu ku jirey, hadana marka la eego qoraalka ay soo gudbiyeen waa mid aan ka jawaabeyn wixii loo baahnaa oo dhan, waa mid ay ka muuqato gal-daloolooyin faro badan, marka soo jeedin la soo jeedinayo waa inay noqoto mid qaraar Goluhu qaraarin karayo oo go'aan hoosta xariiqan ay noqoto, waxay inoo soo jeediyeena waa qoladaa waxaa u qorney waxaa, waxay noogu soo jawaabeen waxaas, dabadeedna waxaanu nidhi Wasaarada Maaliyadu wax ha ka tidhaahdo, dee Golaha Wakiiladu muxuu odhanayaa markaa, waxaa aheyd inay iyagu xaliyaan oo xalka keenaan markey Wasaarada iyo qoladii cabasho keentey la kulmaan oo ay yidhaahdaan ha loo kordhiyo matal Wasaarad heblaayo oo cabaneysay.

   Waxaan doonayaa inaan Miisaaniyada Dawlada laba u kala qaado, mid aan halkan doodeeda ka jeedinayo iyo mid aan jeclahey inaan gaar uga hadlo oo ah tan Golaha Wakiilada.

   Arrinta Golaha Wakiilada iyo Miisaaniyadiisa waxaan soo jeedinayaa:-

   - In Goluhu intuu albaabada isu xidho xubin kasta oo halkan fadhidaa go'aankeeda wax ku yeelato ay Miisaaniyada Golaha iyo sida loo qoondeynayo xubin kasta intey fikirkeeda ka dhiibatu inagu meel dhigno.
   - Arrinta Shaqaalaha Golaha had iyo jeer waxaa ku qoran lacag dhiirigalin ah, shaqaaluhu way cawdaan oo waxay yidhaahdaa lacagta dhiirigalintu

nama soo gaadho, waxaa lagama maarmaan ah in wixii shaqaalaha looga kordhinayo inaynu inagu go'aamino in loogu daro payroll-kooda.

Markaan galo doodeyda Miisaaniyada Dawlada Dhexe, si Golahani u gaadho oo miisaaniyada uu qaraar uga qaato waxaa lagama maarmaan ah inaynu waxyaabo badan niyada ku heyno, laba arrimood baa maanta ina heysta oo ay tahey miisaaniyadu inay ka jawaabto markeynu ansixineyno laabta ku heyno.

Dadkeenu laba qeybood buu u qaybsamaan oo kala ah reer miyi iyo reer magaal, qeybtii reer miyiga oo aheyd beeraley iyo xoolo dhaqato waxaa ku habsatey abaar oo wiiqdey maalkii, beerihii iyo xoolihiiba, miisaaniyadani ka jawaabi meyso dadka xoolihii iyo maalkii ka dhamaadeen oo ka xumaadeen haba yaraatee waxay ku kabeyso iyo waxay wax kaga tareyso kuma jiraan Miisaaniyada, waxaana intaa u sii dheer oo reer magaalkii la qabaan sicir barar baahsan oo aafeeyay dadkii danyarta ahaa iyo shaqaalihii, dadkii reer miyiga ahaa markuu is yidhaahdo xoolihii iibso oo magaalada keeno aaney waxba tareyn oo hadii laba neef iibiyo iyo haduu wada iibiyoba aaney noloshii ka saari kareyn waxaan gaadheyn laba wiig.

sidaa darteed, waxay aheyd Miisaaniyada iyo lacagaha faro badan eek u jira in loogu tudho oo loo qorsheeyso dadkaa abaaruhu beerihii iyo xoolihii ka dhameeysay wax lagu kabo ama loogu gurmado in halkan lagu daraa bay aheyd Miisaaniyaduna kama jawaabin, Gudiddii dhaqaaluhuna kama jawaabin.

Arrimaha dartgeed waxay aheyd Miisaaniyada aynu gacanta inaynu wax uga qoondeyno meelaha aynu wax uga qoondeynayo aynu farta saarno way jirtaaye, meelaha aynu wax uga qoondeyn doonona aan xaga dambe kaga hadli doono.

Waxa la yidhaahdo Sicir bararka dhacey, waxaa la qabtey Gudiyo, Gudiyada iyo Gudidda dhaqaaluhu way kulmeen sidaan warbixintooda ku hayo hadana wax la taaban karo oo ka soo baxay oo lagu daweynayo oo caqli iyo farsamo ah oo la adeegsadey kama muuqato Miisaaniyadan, suuqiina may badilin, talaabooyin baanku qaadey oo aynu aragneyna ma jiraan oo wax isbadaley ma jiraan wax sii kordhey mooyaan, sidaa darteed, Miisaaniyada iyadoo Gudidduna ku mahadsan qodobka aynu sideeda u qaadano tacriifadaha la kordhiyay waxay dhabarka ka sii jabineysaa hadii wax kasta la sii kordhiyo oo hadii dawadii la isku cadeynayay la kordhiyo sonkortana waa la kordhinayaa, intan hadey Gudiddu ka saartey baan u mahadnaqayaa.

Waxay tahey hadii aan sicir bararka aan dawo loo helin in shaqaalaha iyo ciidamada inagu aynu ka daweyno oo kordhino lacag lagu tilmaamo ama aynu aynu u bixino **Kabka Sicir bararka** oo boqolkiiba intaas sida 20% aynu kordhino halka laga kordhinayona waan tilmaamayaa, waxay Wasaarada maaliyadu sheegtey qoraakeeda warbixintana ku cad waxa jira laba korodh (surplus) oo lacag oo yaala kala ahna:-

- Lacag ka soo wareegtey 2013ka oo ah **60 bilyan** iyo wax raaca.
- Tan kalena waa lacag ah **90 bilyan** iyo wax raaca oo **15 bilyan** ah.

Labadaa lacagayow oo labadu ay ku jira Khasnada Dawlada sida warbixintu inoo sheegeyso waxaan u kala qaadayaa laba qeybood:-

Lacagta lixdanka bilyan ah ee 2013kii ka soo wareegtey oo khasnada ku jirta waxaan ka kabayaa waxyaabaha ah in shaqaalaha wax loo kordhiyo, waxaana ka kordhinayaa 20% in shaqaalaha iyo ciidamada loogu kabayo sicir bararka.

Ciidamada, runtii Ciidamudu ha noqdaan Ciidanka Qaranka ama Boolise waxaad arkeysa hadaad habeenkii 12ka soo baxdo iyago wadada taagan, wuu dhaxamoonayaa, wuu aradan yahey reerkiisiina way ka warwerayaan, hadana ma awoodno inaynu siino wax kafeeya noloshiisii oo dhan, laakiin waxaynu awoodna, wax yar Somaliadu waxay tidhaahdaa "war rar karikaro ayaa reer u jabaa" markaa wax wax tari karaya inaguna awoodno oo ah 20%in CIidamada loo kordhiyo oo kale waxay noqoneysaa:-

- Ciidanka Qaranka = **12,904,605,038 Sl Sh**
- Ciidanka Booliiska = **3,767,590,539**
- Ciidanka Asluubta = **710,030,048**
- W. Waxbarashada = **5,144,651,946**
- Maxkamada Sare = **435,730,752**
- Hay'adda Shaqaalaha **= 277,888,768**

lacagahaas waxaa ka soo jarayaa 60 bilyan ee 2013kii soo wareegay ee Khasnada Dawlada ku jirta, Totalka wuxuu noqonayaa lacagahaas marka la isu geeyo **23,240,497,091,** hadaad ka jarto lacagtii 60 bilyan aheyd ee khasnada ku jirtey waxaa wali hadhsan oo keydka inoogu jirta lacag aynu dano badan ku qabsan kareyno meelihii inoogu muhiimsanaa waa meelahaa, ma filayo in ciimadii iyo shaqaalaha in cid intey halkan soo fadhiisato u hadleysaaye inagaa ka masuul ah waynu karnaa inaynu 20% iyo wax ka badan u kordhino.

Miisaaniyada 2016ku waxay korodhey marka loo eego Miisaaniyadii 2015ka **13%,** korodhkaasi ma galin oo xaga shaqaalaha iyo ciidamada kama kordhin, wuxu ka kordhey xaga kharaadka Wax qabadka Wasaaradaha, hadaad eegto Wasaarada walba wax loo kordhiyay shaqaaleheeda way u kordhin karaan, tusaale, **Xafiiska Xeer-ilaalinta** oo kale Miisaaniyada sanadkii hore iyo tan sanadkan waxaa u dhexeeya faraq ah **1,983,762,880** hadey u kordhiyaan Shaqaalohooda waxay noqoneysaa **262,164,096,** wali wuxuu sii heystaa **1,721,598,784** oo kharashaadkii ah, Wasaarad walba waa sidaa, waan taxay mid walba hadaad eegto markuu shaqaalihiisa 20% faraqa badan ee miisaaniyadiisa kharashaad ahaan u kordhey waxay noqoneysaa wax yar.

Arrinta sababtey Sicir bararka waa lacagta kharashaadka badan oo ah master-ka kowaad ee sicir bararka keenay, khasnada Dawlada bil walba waxaa ka baxa **50 bilyan** oo kharashaad ah oo aaney ku jirin mushaharada shaqaaluhu, 50 bilyan meel ku socdaan ma jirto, 1994kii markii lacagta la badaley intii lacag suuqa taaley baa wali dhex wareegeysa, borame waxaa laga isticmaala Bir, Hargeysana maanta Dollar baa laga isticmaalaa oo waxaa lagu odhanayaa waa intaas oo dollar ama haaf dollar, central bankii xagii dhaqaalaha gacanta waxba

uguma jiraan oo lacagtiiba waxaa xukuma shirkadahan sida Zaadka iyo E-dahab lacagtii suuqa marimeyso, awood uu ku soo ururiyo ma jirto markaa lacagtii way qiima beeshay, markaa waxaa lagama maarmaan ah in la yareeyo kharaashkaas oo laga saaro wixii aan lagama maarmaan aheyn sida Kharashka Nabadgalyada iyo shidaalka oo ah kuwa aan marka laga maarmaaneyn.

Markaa waxaan leeyahey waa in Gudiddu dhaqaaluhu amarto oo Goluhu amro in la jaro wixii kharashka baxaya wixii aan lagama maarmaan aheyn, taas uun baa sicir bararka wax lagaga qaban karaa.

Waxaan ku soo gunaanadayaa, arrintan saxaafadu sheegtey ee Gudiddu tidhi waxa jirta in Saxaafadii is heysato oo isku heysato Lacagta halkan loogu qorey ururka SOLJA qaar kale ay leeyihiin miisaaniyadu solja oo kaliya maahee waa saxaafadoo dhan, hadana waxayaabo badan bay ka cabanayaan oo Golaha ayay u taal hadii meel looga jarayo waxay u baahan yihiin in la tababaro oo xirfado meelo ay ku bartaan loo sameeyo, xaqna way u leeyihiin in laga kaalmeeyo lacag ay ku dhistaan Xarum Xirfadeed oo loo dhiso.

Arrimaha halkan ku qoran ee Gudiddu soo jeedisey sida Xafiiska ilaalada xeebaha waxaan soo jeedinayaa wixii ay soo jeediyeen iyagu sida loo kordhiyay maxaabista aynu xidhaney ee ay tahey inaynu wax siino in Iyana wax loo kabo.

**Markaa waxaan soo jeedinayaa:-**

- In go'aan laga dhigo oo Goluhu ka soo saaro go'aan waxyaabaha Gudiddu sida dabacsan u soo jeedisey oo aan loo dayn Wasaarada waxyaabaha la kordhinayo go'aan Gole noqdo.

2. **Md. Xasan Cawaale Ceynaan:-** (2min 32sec) Bismilaahi, Waxaan marka hore talo-jeedin waxaan doonayaa in mushaharka loo kordhiyo Ciidamada, sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in Mushaharka loo kordhiyo Macalimiinta oo lacagta ay qaataan aad iyo aad u yar tahey, waxaan doonayaa in Macalimiinta lacagtooda kor loo qaado oo Goluhu waxay ugu dari karayaan ugu daraan.

   Waxa kale oo aan ka hadlayaa Saxaafada loo dhiso Guri iskuul lagu tababaro, codsina way ku keeneen in loo dhiso Iskuulkaas, waxaana leeyahey Gudidda dhaqaalaha ee ka saartey yaan laga saarin dhaqaalohooda, markaan eegay Qodobka 32aad, 38aad iyo 39aad ee Dastuurka Qaranka wuxuu sheegay in la caawiyo oo la dhiirigaliyo saxaafada Somaliland sidaa awgeed waxaan taageerayaa Miisaaniyada loogu soo darey Saxaafada waxaana ku hambalyaynayaa oo hambalyo u diryaa Wasiirka Wasaarda Maaliyada Marwo Zamzam Cabdi Aadan oo si fiican u soo dhigtey Miisaaniyada waxaan leeyahey Wasiirada hamblayo madaama aad ku soo dartey Saxaafada.

3. **Md. C/qaadir X. Ismaciil Jirde:-** (8min 19sec) Bismilaahi, Gudoomiye waad mahadsan tahey, Mudanayaasha waan salaamayaa, Warbixinta Gudiddu way urursan tahey oo way kooban tahey, waxaan jeclaan lahaa hadii la heli karayo maanta ina dhaafaye maalmaha kale, Gudiddu Golaha ayay u shaqeyneysaa oo

matashaa, Wasaarada magacii Golaha ayay wax ku weydiineysaa wax u gaar ah maaha, waxaan jeclaan lahaa in minuteskii Gudidda la keeno oo aan halkaa ka akhrino Gudiddu wixii ay Wasaarada weydiisay iyo waxay ugu jawaabtey hadii kale su'aasha halkan ka dhalata ee aan tifatirneyn dee gudidduna kama jawaabi karto wasaaradiina waataas la yidhi yaan loo yeedhine aynu gudda galno, sidaa darteed maanta wixii ka dambeeya xaq waxaanu u leenahey in la noo keeno minuteskii oo aanu ogaano wasiirku wuxuu ka jawaabey iyo sida loo weydiiyay, kuna canaan mayo gudiddee waa wax inagu cusub oo shir-gudoonku kaga dhigo oo tilmaam kaga dhigo inay keento minuteska.

Guddda waxaan ku raacsanahey qodobka u dambeeya ee ah Hay'addaha Miisaaniyada ku jira Xeerkoodiina aynaan heyn in saddex bilood gudohood lagu keeno hadii kale Miisaaniyada laga saaro, laakiin waxay aheyd qaabka loo marayo joojintaas ma wasaaradeynu u deynaynaa inay ka joojiso, hadiise la keeni waayo maxaa inooga yaal oo Gudiddu hawsha ay ku leedahey waa intee, taasna inay halkan ku cadaato oo Gudiddu inoo sheegto waxay iska yidhaahdeen Wasaarada.

Waxa kale oo aan taageerayaa oo ayidayaa hadalkii Md. Maxamed Jamaca Cabdi, Miisaaniyadu waa Dakhli iyo Kharash, marku dhaqaaluhu yaraado waxaa lagu horeeya kharashka, kharashka wixii dheeraada ee aan daruuriyaad aheyn ee fasahaad ee sicir barar keenaya waa in dawladu ku horeyso oo tidhaahdo kharashka aan loo baahneyn oo tidhaahdo kaa looma baahna kaasna looma baahna, hadii ay marka is dabooli weydo ay Tacriifada kordhiso, laakiin hadii tacriifadii soo horeyso oo la kordhiy kharashkiina sidaa ahaado anigu ma qabo, waa in kharashka aan daruuriyaadka ah ee fasahaadka oo wuxuu soo kordhinayaa aaney jirin dhib mooyee waa in Gudiddu wasaarada hogaamiso oo ku khasabto inay kharashaadkii ay isla garteen meesha laga saaro.

Cashuurtana waan ku raacsanahey oo daruuriyaadka lama kordhiyo markuu dhaqaaluhu hoos u dhaco iminka baahi baa taal oo daruuriyaadka ayaa loo kabaa markaas sida dhuxusa iyo raashinka iyo biyaha ee noloshu aane ka maarmeyn oo kale waxaana lagu kabaa cashuur dhaaf, taasna waa inay jiraan waxyaabo lama taabtaana waliba Gudiddu waliba cadeyso iyadaa Golaha ka wakiil ah ileyne oo tidhaahdo ogolaan meyno in waxyaabahaas cashuurta lagu kordhiyo in laga dhaafo mooyeene.

Maanta Sicir bararka maxaa keenay? Dee inaga waxba la inagagama weydiin waxaa la sameey Gudi wasiiro ah, Guddi dhaqaaluhu way joogaan, khabiiraa jooga, jaamacadaynu leenahay maanta, markaa waa in la sameeyo Guddi qaran oo aaney fulinta uun ku koobnaanin Gudiddu waayo iyadaa loo aaneynayaa sicir bararka, waxaa loo aaneynayaa kharashaadkan dheeraadka, waxaa loo aaneynayaa lacagahan faraha badan, markaa waa inaan fulinta la isku haleyne Gudiddeenii dhaqaalaha oo mudo dhaqaalaha ku soo jirey oo la yaqaan oo rag Wasiirka kaga khabiirsan baa halkan joogee in talo laga siiyo oo ay talo ku yeeshaan bay aheyd.

Tan kale, dadka qaar baa qaba in waxan ina hayaa aaney sicir barar inflation ah aanu ku imane uu ku yimi control-kii hard currency lacagta dawlada gacanteeda soo galey ayaa ka baxay gacantii Baangiga dhexe, central bank maanta gacanta kuma dakhligii dawlada soo galaya oo cid kale ayaa loo xilsaarey, waxaynu u baahanahey bal horta ineynu ogaano wada shaqeynta Wasaarada iyo Central Bank bal horta sidey tahey, central bank waynu madax banaaneyney oo kantaroolka lacagta waxa suuqa soo galaya iyo wixii ka baxaya isageynu siiney (physical policy), wasiirku waa siyaasi, had iyo jeerna siyaasiinta waxoodu waxay ku xidhan doorashooyinka iyo wax yaabo kale weynu is ognahey inaba siyaasiyiin baynu nahey, laakiin ninka central bank joogaa wuxuu ku xisaabtamaya long-term iyo wax soo socda, markaa waa inaynu ka ilaalino in Wasaaradu central bank la wado hawshiiisa, waxaa la leeyahay central bank hawshiisii uma madax banaana, waxaana soo jeedin lahaa inaynu halkan ugu yeedho oo isaga afkiisa ka soo baxdo sidey u wada shaqeeyaan Wasaarada.

Dastuurka ayay ku jirtaa in wixii dawlada soo gala ay isaga ku dhacdo oo aan baan ganacsi la dhigin central bank baynu leenahey aynu u ansixiney, inay ku soo dhacdona xaq waxaynu u leenahey halkan inaynu ugu yeedhno oo weydiino sidaa ma waxbaa iska badaley? WSC. **(Seconded).**

4. **Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne:-** (2min 04sec) Mudane Gudoomiye waad mahadsan tahey, hadalkaan odhan lahaa runtii xildhibaanadii iga horeeyay ayaa iga qaatey, waxaan ku soo koobayaa dhowr qodob, had iyo jeer waxaynu nidhaahnaa waxa ceynkaasa la qaban mayo ama waxaa la sameynmaayo, sababtuna waa xaga dhaqaalaha ilaa xad inagaa abuureyna musuqmaasuqa waayo hadeynaan ninkii shaqaalaha ahaa ama askarigii wax ku filan lama siiyo, hadaan la siin sharcina fuliyo mayo hawlna qabsoomimeyso, markaa hadaan wax la kordhin waxay taabaneysaa hawlihii oo horumar la gaadhiyo.

   Teeda kale waan ku waafaqsanaey ragii yidhi Gudiddu waxaad moodaa in aaney powerkoodii isticmaalin waxay soo sameeyeen wuxuu noqdey waxaanu aragney wasaarada, waayo qoladaasi wasaaradey la xidhiidhaa, waxaa jeclaa inay wasaaradii kala doodeen wixii oo ka dib go’aan gaadheen laakiin wixii iminka waa tixraac, intaas ayaan ku soo koobayaa, waad mahadsantihiin.

5. **Md. Saleebaan Cawad Cali:-** (6min 2sec) Shir-gudoonka, Xidhibaanada, Saxaafada iyo marti sharafta ASC, salaam ka dib miisaaniyada waxaan filayaa Gole ahaan waa miisaaniyadi 10 ee aynu ansixiney ama Golaha soo martey marka maanta waxaa la odhan karaa waxaynu ka heysanaa faham balaadhan Miisaaniyadu waxay tahey iyo sidey noqon karto, dakhliga, kharashka, doodeeda, ansixinteed iyo dabagalkeeda.

   Waxaynu ognahey Miisaaniyadu waa Dakhli iyo Kharash isu dheeli tiran oo hadii dheeli tirku dhaco oo kharashkuna uu bato dakhligu yaraado (divest) bay gashaa, taasina qaranka uma wanaagsana, waliba dawladaha dhaqaalaha amaah bay qaataan oo tusaale World Bank ama IMP ka qaataan inagu ma lihin

awoodaas, markaa mar walba shilingka ina soo galaya iyo baahideenu waa inay xadidnaato oo aynu eegno duruufteena dhaqaale ee inagu xeeran.

Sidaa daraadeed waxaan anigu leeyahey Miisaaniyadana qodobada waaweyn waa la siyaasadeeyaa laakiin nuxurka iyo waxyaabaha runta ah siyaasad ma galaan, waa inaynu ogaano hadeynaan dakhli helin in aynaan kharash kordhin Karin, kharashkuna waa sida in la kordhiyo mushaharka shaqaalaha ama mushaharka ciidamada ama kan macalimiinta oo gaar loo kardhiyo ma sameyn karno hadeynaan meeshey ka soo baxayso aaney inoo cadeyn, hadii inagu hadeyno nidhaahno ha la kordhiyo taasi waa ciyaar oo waxa weeye halkee baynu saarnaa.

Hadii xitaa kharashaadka qaar ha la dhimo sida C/qaadir sheegay dee waa in la cadeeyo oo gudiddu iyo wasaarada iyo umadu isla gartaan "kharashka halkaa ku yaal looma baahana" tusaale ahaan waa in la yidhaahdo, Gudiddii may cadeyn oo ma odhan kharashka noocaas ahi waa mid aan loo baahneyn, waxay inoo soo gudbiyeen cabashooyin faro badan oo ay leeyihiin waa na loo yimi maxkamadii baa noo timi, maxaabiistii baa noo timi, asluubta noo timo oo waxay sheegeen in cabsho kharash badan jirto laakiin may odhan kharashkaasi waa unnecessary ha laga saaro oo halkaa ha lagu daro ama ha loo kordhiyo cidaas, madaama ay sidaa tahey waxaan qabaa fikirka ugu horeeya ee aynu ka duuleyno inoo noqdo in Miisaaniyadu is buuxin karto ee inteynaan kharashka rarno dakhliga jarin, taasi dareen kale oo aan wanaagsaneyn bay keenaysaa oo halkee laga keenaya weeye.

Anigoo eegaya duruufta dhaqaale, sideedana dhaqaalaha marka la eegayoa Miisaaniyada sida c/qaadir sheegay waxyaabaha luxury baa la saaraa cashuurta sida gaadiidka, Furniture-ka iyo waxyaabah cosmetics iyo qaadka iyo sigaarka ee daruuriyaadka lama saaro oo taas waan ku raacsanahey, sida iiga muuqata tacriifadaha la keenayna marka laga reebo dhuxusha iyo cawska oo kale oo qiimaha aadka u hooseeya leh waxa la saarey waxyaabaha luxury-ga ah weeye.

Si kastaba ha noqdee, anigoo eegaya duruufta dhaqaale ee dalka iyo waxyaabaha luxury-ga cashuurta la saarey saameynta ay ku yeelaneyso dhaqaalaha dalka anigu waxaan ku raacsanahey Gudiddu oo aan aad u taageerayaa wax tacriifad ah inaan sanadka 2016 lagu kordhin Miisaaniyada, hadii la doonayo in la kordhiyano aan laga soo saaro miisaaniyada oo gaar loo keeno sidaa ay u celiyeen Gudiddu waan ku waafaqsanahey.

Madaama aynu jarney cashuurtii ileyn miisaaniyadu cashuurtaas tacriifada ah bay ku saleysan tahay kharashkuye, waxa laga yaaba inay iyagu Wasaarada ka wada hadleen Gudiddu oo yidhaahdeen waxyaabaha tacriifada waan jareynaaye halkee lagactii galinaa oo ka soo saarnaa mise waxaad ku talineysaa kharashkaanu jarnaa, si kastaba ha noqotee anigu waxaan odhan lahaa tacriifad la kordhiyaa yaaney jirin, hadii la kordhinayona gaar ha loo keeno oo yaaney miisaaniyada la raacin iyadoo cilmeysan gooni ha loo keeno.

Waxa kale oo aan soo dhoweynayaa qodobka kale ee Gudiddu keenay ee odhanaya in Maxaabiista 2000 sl sh ha loogu daro 2000 sl sh ee hore u qaadan jireen oo looga dhigo 4000 sl sh maalintii si raashina la siiyo maalintii ugu filnaanto, markaa labadaa Qodob Gudidda waan ku raacsanahey.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in aaney noqonin xildhibaandu markey ka doodayaan waa inay wax run dhab ah oo suurtagal ah noqon karaan, madaama aynu jarney tacriifadihii oo Gudiddu jartey oo Golaha keentay dareenkeenuna u badan yahey in la jaro tacriifadahaas waxaan qabaa wixii kharash ah ee aynu kordhinaa waa wax aan inaga soconeyn oo hadaa hadii inaga aynu wasaarada ku khasabno oo nidhaahno shaqaalaha iyo ciidamada 20% ha loo kordhiyo wixii inoo hirgali maayaan oo waxay noqoneysaa arrin aynu isku hawlney oo aan suurtogaleyn, markaa Mushaharka Shaqaalaha, Ciidamada iyo Mushaharka macalimiintaba hadii aynaan cashuurtii kordhiney, kharash aynu jarney oo Gudiddu inoo sheegteyna aanu jirin, inaan waxba la kordhin sanadka 2016ka yaan qabaa.

**Sidaa darteed, Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Mar hadeynu joojiney tacriifadii, kharash aynu jarney oo Gudiddu inoo sheegteyna jirin, meel la cayimey oo dooda mudanayaasha ka muuqatey in wax laga jarano jirin, sanadka 2016ka yaynaan kordhin wax mushahar shaqaale iyo ciidanba, waxaana taageersanahey sidaan soo sheegay labadaa qodob ee Gudiddu tidhi Cashuurtana yaan la kodhin iyo kharashka maxaabiista ee 2000 sl sh/= loogu kordhiyay, waan ka baxay.

6. **Md. Siciid Warsame Ismaciil: -** (10min 12sec) Bismilaahi, markaan eegno sawirka guud ee ay leedahey miisaaniyadu waxaad moodaa in aaney aheyn mid ku saleysan wacyiga guud ee dalka ka jira, wadanku wuxuu ku jiraa abaaro, wuxuu ku jiraa sicir barar, wuxuu ku jiraa dhaqaale xumo iyo shaqo la'aan miisaaniyadu intaaba kama turjumeyso, waxaadna moodaa mid markastaba horseedaysa sicir barar hor leh iyo wax dadka uun sii saaraya culeys.

Sida la sheegayona waxay kordhiyeen miisaaniyada 13%, meel laga kordhiyayna garan meyno, waxa korodh miisaaniyad la sheegaa marka income-ka dadku kordho, laakiin iyadoo dadka dakhligu sii diciifayo oo reerihii saddexdii wakhti mid ama laba wax cunaan hadana miisaaniyada baa korodhay iyo tacriifad baanu kordhiney, markaa horta Gudidda waan ku raacsanahey in meesha laga saaro tacriifada in la kordhiyo.

Marka la eego sicir bararka waxaan u sababeynayaa lacagta dollarka ah ee Xukuumadu ku qaadato Dollarka iyadoo shilling Somaliland lagu qaadi jirey, xukuumadu waxay keentay inay dollar ku qaado oo dollarkii suuqa galo, halka markii hore marka shilling lagu qaado dollarkii suuqa ka soo bixi jirey oo shilling-ku gali jirey oo shicibkii iyo ganacstadiiba dollarkii bay boobayaan, taasina waxay keentay in dollarkii uu qaaliyoobo shilling-kiina uu qiimo dhaco.

Waxa kale oo jirta hantidii qaranka maalin walba waa la iibinayaa hadana waxaa la leeyahay Miisaaniyad baa korodhay, markaa nin leh guryihiisii baan iibiyay hadana miisaaniyad baan kordhinayaa dee labo is qabta maaha, waynu kacney oo waxaynii baynu iibineynaa guryeheenii, markaa waxaan soo jeedinayaa waa in gabigaba meesha laga saaro iibinta hantida qaranka, waliba ma cadda hantida la iibinayo ma aqalka Madaxtooyada, ma aqalka baarlmaankaa mise waa dekada, wax alaale waxay tahey ma cada, markaa gabi ahaanba ha laga saaro Miisaaniyada Iibinta Hantida Qaranka.

Intii uu sameel heystay Wasaarada Maaliyada wuxuu laba jeer laban laabay cashuurtii shidaalka, cashuurta shidaalka in dadka laga dhimo si sicir bararka iyo qiimo bararku hoos ugu dhaco, shidaalku waa kan kaliya ee maamula qiimaha wax kasta, markaad eegto shidaalka lacagtii sanadkii hore ka soo gali-jirtay shidaalka iyo tan iminku aad bay u kala duwan yihiin, marka halka waxaa ka muuqata in lacag cusub lagu kordhiyay shidaalkii taas oo sicir iyo maciishadii oo dadka ku korodha keeneysa.

Waxaynu ansixiney oo raaciney Miisaaniyadii tan ku saddex aheyd go'aamo Gole oo go'aamo sharci ahaa aheydna inay sideedii u hirgalaan waxaa ku jirtey in Miisaaniyadaha dambe la Goboleeyo wax ka hirgaleyna ma jiraan, markaa hadeynu maalin walba hadalno oo aan waxba laga qaban dee ha iska walaaqdaan oo yaaney dib inoogu keenin.

Waxa kale oo bariga ansixinay in 2% Gobolada Barriga la mashaariiceeyo oo sidii loo maamulilahaa la soo raaciyo Iyana waxba iskama badalin lamana soo raacin, markaa waa qeyru sharci iyo xaaraan in Golaha dib loo soo hordhigo iyadoon go'aamadii aan waxba laga qaban, 2% Gobolada bari hadaaney mashaariiceysneyn oo wax lagu qabto aan la soo raacin waa in laga saaro miisaaniyada.

Waxa kale oo meesha ku jira lacago faro badan wax lagu qabanayo iyo waxay yihiin aan la aqoon, khasnada guud ee la sameeyay cid saxiixda kuma qorna, meel ay hoostagto kuma qorna, meel lagu ansixiyay ma jirto, lacagahaa ku jira meelaha ku haboon ha la galiyo, khasnadan guud ee 255 bilyan ah cid saxeexda iyo cid maamusha aan la garaneyn waa in la kala geeyo meelaha baahida u qaba oo shaqaalaha iyo wax looga kordhiyaa.

Waxa kale oo muhiim ah, lacagta la yidhaahdo keydka qaranka oo 8 bilyan iyo dheeraad ah ma cada, tii hore ee aynu ansixiney ee keydka qaranka ku jirtey xagey ka dhacdey, xagey ku keydsan tahey, siyaasad cad oo lagu sheegay in keydka lagu maamulayo ma jirto, dee ma bangigey taal ileyn Xeer iyo siyaasad cad oo lagu maamulona waatan aan laheyne, Iyana waa in loo sameeyaa Xeerkii iyo siyaasadii lagu hagi lahaa.

Waxa kale oo Iyana miisaaniyada ku jirta, lacago badan oo aan sharaxneyn oo ay ka mid tahey Dhismayaasha oo lagu sheegay dhismayaal, waa lacag aad u farabadan oo mareysa 12 bilyan, Iyana waxa la dhisayo, meesha laga dhisayo iyo cid loo dhisayo waa in la soo raaciyo sharaxaad, xiligan aynu abaaraha ku

jirno oo sicir bararka ku jirno ha loogu kordhiyo shaqaalaha iyo ciidamada mushaharka ayaan soo jeedinayaa.

Kabkii Dawladaha Hoose oo aan meesha ku jirin waxa looga saareyna aan la sheegin baa jirta, markaa suurtagal maaha in wax Goluhu ansixiyay si yar meesha looga saaro, waxaa ku jirta siyaasada Miisaaniyada in Gobolada 5% loo kordhiyay meel kaga taal maan arage meeday Iyana.

Haamaha Shidaalka oo aynu qaraar cad ku diidney ayaa hadana miisaaniyadeed la ina horkeenay, taasina waa waxaan dhaceyn waa in meesha laga saaro, sidoo kale Warshadaha leydhka Hargeysa, Berbera iyo Burco shirkado private ah baa lagu wareejiyay maxaa inoo keenay, Iyana meesha ha laga saaro.

Waxa kale oo jirta lacago badan oo Wasaaraaha ay Hay'adduhu siiyaan oo Iyana aan miisaaniyada lagu soo darin meeshana la keenin waxayna aheyd in lagu soo daro deeqaha, markaa kuwaasna waxaan odhan lahaa Iyana ha lagu soo daro mana ah in miisaaniyada dadka dhinac laga saaro oo Cashuurta lagu qaaliyeeyo dhinacna hay'adduhu ka bixiyaan waana double, Wasaaraduhuna ha keenaan wax alaale wixii hay'adduhu ku caawiyaan.

Sicir bararka waxaan soo sheegay in Xukuumada laftigeedu ay ka masuul tahey oo ay keeneyso lacagahan ay dollarka ku qaadaneyso, sidoo kale Zaadka iyo E-dahabka intuba masuul ka yihiin sicir bararka, marka waxaan soo jeedinaya in Goluhu go'aan ka gaadho Zaadka iyo E-dahabka iyo lacagta Xukuumadu dollarka wax ku cashuureyso oo intaaba dalka aynu ka gaadhno, wixii lacag ee adagna lagu wareejiyo Central Bank sidii uu horeba ugu maamuli jirey Bangigu, waad mahadsan tihiin.

7. **Md. Maxamed Faarax Qabile: -** (9min 55sec) Bismilaahi, Goboladu isku duruuf maaha, Gobolada barri waa anagii tagney laba arrimoodna kamma wada maqnaan karto meelaha qaarkood, waxa weeye barnaamijkan la yidhaahdo JPLG kamuu hirgalin Gobolka Sanaag, kamuu hirgain Gobolka Sool, kamuu hirgalin Ceynaba, waxa kale oo isna meesha ka maqan kabkii Miisaaniyada laftigiisii yaan la odhan markaa "A", Ciddi wax heysatey barnaamijkaasi wuu sii hagaajiyay, ciddii aan heysan wuu sii liciifiyay, marka Gobolada aan helin JPLG sida Sanaag iyo Sool arrintaasi baahiweyn oo caqab ku ah dhaadhicintii Dawladnimada oo Goboladii ka reebay.

Waxaan la qabaa Mudanayaashii iga horeeyay Hay'addaha ay ka mid yihiin Haamaha shidaalka, Shirkadaha shidaalka Hargeysa, Berbera iyo Boorame waa la private-gareeyay, go'aan baynu ku laalney arrinta haamaha oo kale waana ayaan daro iyo sharci daro loo badheedhay oo waliba Golahan waajibaadkii iyo doorkii la gudboonaa aaney gudan oo aynu garaneyno marka taas oo kale dhacdo waajibka xigi lahaa, waana ayaan daro Goluhu haduu taas kariwaayay inuu gacanta u taago hay'addihii inaga wareegay oo lacagta maanta aynu doon dooneyno oo shaqaalihii kuwa golaha ha noqdaan ama shaqaalaha weynaha kale ee aynu ka fakareyno ha noqoto ama sicir bararkan taagan ha noqotee dhamaan

waxa weeye shaxda Miisaaniyada Qaranka ku cad waxaa loo guurin karaa meesha u baahan ee yaan meel shilis la sii rarin.

Waxa ku jira miisaaniyada oo ayaan daro weyn ah 36 bilyan oo hanti umadeed ah, waa ayaan daro iyo sharci daro, xildhibaan iga horeeyay baa lahaa marka weynu kacney dee waa runtii, waxaan leeyahay tii hore ayaa ayax daaqey ma odhan karo waa la iibiyay ayax baa habeen daaqey, ayuxuna meeshuu daaqo wuu laab-xaadhaa, marka qarankani uma baahna laab-xaadh dambe eh gabi ahaanba waa in laga saaro Miisaaniyada, fadeexad bayna inagu tahey in Goluhu dakhli noocaas ah gacanta u taago, waana la qabaa ragii soo jeediyay arrintaas.

Arrinta kale ee Tacriifada sida uu tilmaamayo **Qodobka 14aad** ee Dastuurka Qaranku wuxuu sheegaya in loo eegayo maslaxada qaranka, iska daa maslaxad qarane waxay iyada laftigeedu qeyb weyn ka tahey sicir bararka dhacaya sida loo rarey tacriifada, sidii nidaamku ahaan jirey waa badeecada soo degeysa ee shey kasta, su’aalahaas iyadoon laga weydiin Wasiirka iyo hawl wadeenadisa waa sharci daro inaynu gacanta u taagno.

Intaa waxaan ku darayaa, Waxaynu nidhi dhamaan Hay’addaha aan sharciga laheyn Mar hore ayaynu nidhi lifaaq ha lagu daro, mar hore ayaynu saddex bilood ha lagu keeno, sida soo jeedinta Gudidda dhaqaalaha ku jirteyna maya waayo sharcigu waa ku dhaqan ama waa iska deyn, waxaan qabaa dhamaan hay’addaha aan sharciga laheyn laga saaro miisaaniyada oo aaney wax mad-madaw (imbiguty) aaney Golaha ka bixin.

Arrinta kale ee aan Iyana halkan ka soo jeedinayo waa qaabka loo kabayo SOLJA oo aan qabo inay yihiin xirfadlyaan qarankan u muhiima kobcinta saxaafadana xili inaga saaran yahay, waxaa fiican in kabid loogu daro laakiin laga saaro madax looga soo dhigay inay headline ka yihiin Miisaaniyada oo qaabka ay ugu jirto wax laga badalo, laakiin in saxaafada la xuso waa arrin aan ayid sanahey.

Waxa kale oo resolution-kan Golaha aan jecelahey inay ku jirto waxani waa miisaaniyad qaran oo Qodobka 55aad ee Dastuurka ayaa inoo ogol, waxaan leeyahay meelaha aan leenahey ha la jaro shaqaalaha masaakiinta ah ee sicir bararku ku Kacey ee aanu mushaharkii maanta waxba u qabaneyn iyagaa ka muhiimsan oo waxaan qabaa in kuwaa wax loo kordhiyo.

Ansixinta Miisaaniyadu waxay ku imaneysa marka Hadal-qoraalku soo dhamaado Wasiirkana su’aalaha weydiino, waxa kale oo meesha taala gabi ahaan Tacriifadahaas su’aalo ayaynu uga baahanahey in laga jawaabo, mana aha in miisaaniyada aynu sii deyno ilaa aynu ogaano meesha ay galeyso.

Waxaana iyaana ka hadlayaa Hanti-dhowrka Qaranka, xiliga uu dastuurku cayimayo sida ku cad **Qodobka 55aad** waa inuu ku keeno xisaab xidhka Miisaaniyada Xiligaa dastuurku cayimay oo ah saddex biloodka hore, waayo waxaa ina daashatey Miisaaniyado intey is fuuleen aynaan haynba xisaab xidhadoodii, markaa waa in sanadkii u dambeeyay baynu ku jirnaaye ka tagnaa wax xaqiiq ah iyo xaashi cad, sharciga sidiisa loogu dhaqmo.

Waxaan ku soo gabo-gabeynaya, Shaqaalaha Golaha waa inaynu ill gaar ah ku eegno, waa nimanka inala midka ah oo mar inala rawaxa, waliba inaga hawsha badan markay gacan noqoto, markaa wax xus mudan oo inagu waajib ah ha lagu eego ayaan si gaar iyana ku baaqayaa, WSC.

8. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** (9min 31sec) Bismilaahi raxmaan raxiim, horta Miisaaniyada marka hore Gudidda soo jeedintiisiii aheyd in Cashuurihii dib loo celiyo iyo maxaabiista oo ay wax u kordhiyeen labada aad baan u ta'kiidinayaa, marka labaad waxaa mudo dheer laga hadlayay Gobolada maxaa ka gaadha Kharashka Miisaaniyada taasna wali doodeedii way taagan oo Miisaaniyadii waxay ku dhamaataa Xafiisyada Xarumaha, inkasto hada laga Hadley hadana wali waa mid taagan, markaa waxaan soo jeedinayaa in aynu Wasiir walba u yeedhno oo aynu weydiino wuxuu Gobolada ugu talo-galey kharash ***(Seconded)***. Waayo maaha ineynu Wasaarada Maaliyada uun inaynu ku mashquulno maaha ee Miisaaniyadu waxay u qeybsantaa intaas oo Wasaaradood iyo Hay'addood.

Miisaaniyadu marka hore waxaa la inoo horkeenaa inaynu ansixino waana waajibaad dastuura taasna micnaheedu maaha inaynu diidno iyo inaynu iska yeelno, waa inaynu toos-toosino, hufno isla markaana wax ka weydiino Wasaaradii, intaa ka dibna dee waa wax la sugay oo ansixin bay inooga baahan tahey.

Waxaa aad looga hadlayay kharashaadka oo xildhibaanadii iga horeeyay ka hadleen, horta meel kharash ku filan yahey ma jirto markeynu eego sida Wasaaradaha iyo Hay'adduhu u shaqeyn karaan, laakiin waxa weeye in kharashka loo sinaado oo yaaney meelna ku badan meelna waayay waxay ku shaqeeyaanba.

Arrinta kale ee aan halkan rag qaar ka hadleen waxa weeye in shillingkeenii inuu dhacey oo maanta wuxuu marayaa **8,000 sl sh/=** iyo dheeraad halkii dollar, anigu sicir barar kale ma jiree ee shillingkeenii baa qiima dhacey, anigu sidey iigu muuqato waxaan leeyahey sababaha wax aka mid ah sharcigii bangiga waynu ansixinaye fulin buu u baahan yahay si baanku lacagtii u maamulo, arrin kale ayaa jira waxan la yidhaahdo E-dahab iyo Zaadka lacagtii adkeyd waxay ku jirta zaad iyo e-dahab oo lacagtii dibada laga soo dirayayna zaad baa lagu soo dirayaa, sidoo kale lacagtii xoolaha ka soo noqonayayna suuqa waxaa lagu ururinayaa oo zaad iyo E-dahab bay iyana ku jirtaa, markaa hadaan arrintaa Go'aan qaran laga qaadan shillingkii sidaasuu u sii qiima dhacayaa.

Gudiddu waxay ka saareen xoogaa saxaafada ugu jirtey, arrintaas ayaan doonayaa inaan Xildhibaanada fahamsiiyo waxa ugu jira ee ugu muhiimsan waxa weeye in loo dhiso institution lagu tababaro saxaafada lacagta Miisaaniyada ugu jirtaa waa taas, saaxafadu maanta halkey mareyso iyo tayadeedu sidey u dhimatey waynu ka wada dharagsanahey, in saxaafada loo saameyo xarun tababar waa mid muhiima oo hadaan la dhisin oo doorkooda aqooneed la hagaajin anshax yeelan maayaan, waxa kale oo loo baahan yahey in Xeerka saxaafada ee jira lagu daro in loo dhiso gole anshax marineed oo ka

qabta dadka si ay u nabadgalaan, markaa aynu isku dhaafno khilaafdka yare e ka jira dhexdooda, muhiimadu waa in loo dhiso institution saxaafadeed oo lagu soo tababaro, Gudiddu waxay tidhi sharci baaney lahey, sharci wey leedahey in wax laga badalo mooyaane, guud ahaan waxaa laga hadlayaa saxaafade urur gaar ah laga hadli mayo, waxaan si xoog leh u soo jeedinayaa in Saxaafada institution-kaa loo dhisayo aan laga saarin.

Waxa kale oo Miisaaniyada ku jirta hadaad eegto siyaasada Miisaaniyada oo meelo badan taabaneysa, waxaa ka mid ah wax Ciidamada la kordhiyay iyo waxa la yidhaahdo pention, waxaa ka maqan oo aan isleeyahay waa siyaasadii Miisaaniyada kabka Gobolada iyo Degmooyinka oo ka muuqan waxaan leeyahay taana aynu u deymo la'aano oo miisaaniyada aynu raacino in hordheceeda ay ka muuqato kabka Gobolada.

Waxaan ku jirin oo aan lagu soo darin Xoolaha Nool, waxa kale oo siyaasada ka maqan cashuur uun baa la kordhiyaa, cashuurtuna dadkuun bay paraside ku tahey ee maaha wax soo saar (source) soo baxaya, waa inay siyaasada Miisaaniyada ku jirtaa sida dadka dhaqaalihiisa iyo noloshiisa wax loogu abuuri lahaa.

Waxaa ku jira Miisaaniyada arrimo badan oo Wasaarada Maaliyadu inay tafsiir ka siiso Golaha u baahan sida hantida la iibinayo, dawladu hantideeda way iibin kartaa oo sharci baa ka yaal, laakiin tafsiir bay u baahan tahey sida loo iibinayo.

**Ugu dambeyn, waxaan soo jeedinayaa:-**

- Miisaaniyada Waajibaad baynu ku leenahaye markeynu ka gudano waajibaadkeenaas ka dib aynu ansixino.

9. **Md. Maxamed X. Xuseen Ciise:-** (11min 47sec) Shirgudoonka iyo mudanayaashaba waad salamantihiin, miisaaniyadan golaha hortaala ee ay miisaaniyadeedu socoto sida caadiga ah waxay mari jirtay intaa goluhu joogay nidaam isku dheeli tiran oo ay dawladu ugu talo gashay kharash iyo dakhli is dheeli tiran marka horaa la soo qorsheeyaa miisaaniyada oo qaabka hada ay u dhigan tahay waa qaab laga soo shaqeeyay.

Markaa marka hore waxay ku haboontahay inta aan golaha la keenin in aad looga taxadiro oo wasaaradana lagala shaqeeyo ayay ku haboon tahay, run ahaantii gudida war bixintooda waxyaabihii ay wasaarada ka wada hadleen wey soo gudbiyeen oo wax sidaa u weyn kumay soo kordhin.

Maadaama ay miisaaniyadu korodhay waxaa haboon in ciidaada iyo shaqaalaha wax loo kordhiyo, laakiin waxaad moodaa in ayna wasaada iyo gudidu aanay ka wada halin oo aanay goluhuna aanay ka hawl galin oo rayigasi aanu inta aan miisaaniyada la samayn aanu u gudbin, waxaanay ku hanoonaan lahayd in ay gudidu talo ahaan ugu gudbiyaan markii hore, sidaa awgeed hadii aan hada wax dheeraada ku darno in dakhliga iyo miisaaniyadu ay is dhimayaan.

Marka la eego miisaaniyada korodh ayaa ku jira dhanka kale marka aad eegtana sida xildhibaano madani ka hadleen in manta shilinka Somaliland maanta uu marayo halkii ugu danbeysan oo uu aad hoos u ugu dhacay, waxyaabaha sababay oo ay ka midyhiin sida xildhibaanadii iga horeeyayba ay sheegeen waxaa meesha ka maqan baankii dhexe oo meesha ka maqan, waayo waxay ahayd in uu lacagta adeg ee dalka soo gasha in uu isagu maamulo ayay ahayd oo wixii dollar ahi ay soo maraan baanka oo uu isagu qiimeeyo sixirka.

Sidoo kale waxaa jirta in wasaaradeheena oo dhami ay kaydad xisaabeed ku leeyihin xawaaladaha sida dahabshii halkii ay ahayd in ay ku yeeshaan baanka dhexe waana qalad weyn iyo maamul xumo, taasina waxay keenaysaa in lacagtii adkayd oo dhami ay xawaaladahu qabtaan.

Waxaa kale oo Iyana qayb ka ah lacagaha lagu is ticmaalo Zaad-ka iyo E-dahab-ka in isticmaalka shilinku uu yaraado, waxaanay ka qayb qaadanaysaa sixirbararka marka uu qofkii alaabada uu iibsanayo ku isticmaalo Zaad ama E-dahab waana in wax laga qabtaa labadaa arimoo hadii kale loo tag heli maayo waxaanan odhan lahaa hala sameeyo xeer kooban oo layidhaa LADAGAALANKA SIXIRBARARKA sidii aan horaba ugu keenay mooshin arinkaa laga hadlayo waxaanan codsanayaa in la soo celiyo mooshinlaa oo galuhu ka doodo.

Waxaa kale oo aan gudidda  ku raacsanahay arintii ay sheegeen in maxaabiista wax loo kordhiyo waan taageerayaa, waxaa kal oo aan gudida ku raacsanahay celinta tacriifada waayo isma kaashan karayaan sixirbararka iyo tacriifadahan la kordhiyay, sidoo kale arinkan korandha ka ah sida mudanayaashii iga horeeyayba ay ka hadleen waxaan soo jeedinayaa in wasaaradii iyo gudida in dib loogu celiyo oo la isla kaashado oo wixii macquul ah laga wada hadlo hadana sideeda loo daayo ayaan leeyahay maadaama ay wasaaradu isku dheeli tirtay kharashka iyo dakhliga .

Waxaa kale oo aan aad u taageerayaa sidii uu xildhbaan Axmed Ducaale sheegay ee ay gudidu yidhaah deen waxaan ka saarnay saxaafada oo runtii cabasha badani ka jirto oo wasaaradana ay ka dalbadeen in loo sameeyo miisaaniyad oo wax loo ogaalay waxaan leeyahay sideedii haloogu daayo ayaan soo jeedinayaa lana dhiiri galiyo loona sameeyo meelo ay ku tababartaan si ay u yaraato cabasha dawlada iyo saxaafaduba, si ay u soo baxaan dad aqoon iyo khibradba u lihi intaa ayaan ku soo koobayaa waad mahadsantihiin.

10. **Marwo. Baar Siciid Faarax:-** (12min 13sec) ASC, bacda salaam, Miisaaniyada waan soo dhoweynayaa marka hore, waxaan Gudidda dhaqaalaha ugu mahadnaqayaa Cashuuraha ay ka saareen, waxaan kale oo ka hadlayaa dhamaan siiba lacagta ganacsatada iyo xoolaha cashuuraha loogu qaado in lagu shubo shirkado private ah oo aaney ku dhicin Bangiga dhexe, waxaa lagu shubaa

shirkadahaas dabadeedna jiwan baa lala tagaa Dekada oo jiwankaas ayaa wax lagu soo cashuuraa, arrintaasi waxay meesha ka saareysaa Bangigii, waxa haboon bangigu madaama uu umada ka dhaxeeyo oo aaney cid gaari ahi laheyn markaa lacagahaa lagu shubayo Baananka private-ka ha loo daayo Bangiga Wasiirka wax ha laga weydiiyo.

Waxa kale oo aan ka hadlayaa deeqa haya'ddaha caalamiga ahi ina siiyaan kuma cada Miisaaniyada, iyadana Waxaan soo jeedinayaa in Wasiirka looga yeedho oo wax laga weeydiyo sababta Miisaaniyada loogu soo dari waayay ileyn waa lacago badan oo ay tahey inay Miisaaniyada ka muuqatee.

2915kii Miisaaniyadii aynu ansixiney wuxuu Goluhu go'aan ku gaadhey in Miisaaniyada la goboleeyo oo Miisaaniyad Goboleysan la inoo soo gudbiyo, si daadejinta Maamul ay qayb uga qaadato, sida ay sheegtey Gudidda Ilaalinta Hantida Qaranka ee Goluhu Gobolada intooda badan Gobolba ka uu ka fogyahey ma gaadho Miisaaniyadu, markaa waxaan soo jeedinayaa in la Goboleeyo Miisaaniyada si ay hoos ugu daadegto, waxayna aheyd go'aan gole.

Waxa iyana meesha ka maqan kabkii Dawlaha Hoose, dawlahada hoose isku duruuf maaha, Goboladu isku duruuf maaha, mashruuca JPLG-guna Degmooyinka muu wada gaadhin, waxaa jira gobolo intaasi kharash u aheyd, suurta gal maaha in laga saaro, markaa waxaan soo jeedinayaa kabka Dawladaha Hoose in lagu celiyo Miisaaniyadii iyadoo dastuuriya horena loogu soo dhaqmi jirey ayna marna dhicin in laga saaro, waliba waxaan soo jeedinayaa in kabka dawladaha hoose la kordhiyo.

2% Gobolada Bari oo ah had jeer laga hadlo iyadoo ah lacag umada laga jaro oo aaney aheyn mid dawladu ku caawiso, lacagtaas meelay jaan iyo cidhib dhigto lama yaqaan, masuuliyiintii baanu nahey ka soo jeeday Goboladaa bariga warna uma heyno oo ma aragno, 2% oo aan aheyn lacag umada laga jaro oo aaney xukuumadu ku caawin, waxaana loogu talagalaye in umada lagu caawiyo xaaladoodu aad iyo aad hoos u tahey oo aaney Miisaaniyadi gaadhin, Hay'addona waxba gaadhsiin, markaa lacagtaa meeshii loogu talo-galey ha la gaadhsiiyo ama ha loo daayo umadii laheyd, Wasiirkana ha loo yeedho si loo weydiiyo, anigu hore ayaan u weydiiyay waxayna iigu jawaabtey Xisaab cad baanu keenaynaa oo waanu heynaa.

Waxa kale oo ku jira Shirkada Leydhka Berbera iyo Hargeysa, soot ii lagu wareejiyay Private-ka, ma iyadoo private lagu wareejiyay oo leydhkii ay aheyd in umada laga jabiyo meesha laga saarey ayaa hadana lacag loogu darayaa, meynaan ilaahey ka baqeyn oo umad xishooneysa ahey, waxa kale oo ku jirta Haamihii shidaalka, haamahaas Goluhu wuu diiday in la wareejiyo, xukuumadiina si sharci daro ah bay u wareejisay hadana Miisaaniyada lacag baa ugu jirta, maxay tahey sababtu, ma qolyihii loo dhiibay baa durba Kacey.

Waxa kale oo u baahan in la inaga shaafiyo Khasnada Dawlada, khasnadaasi waxay ka mid aheyd Go'aamadii ka soo baxay Golaha ee la soo jeediyay, khasnadii waa la sameeyay yaa maamula, meel ay ka furan tahey iyo cid shaqaale u ah meynaan arag, cid maamusha garan meyno, cid mada u ah la inooma sheegin, markaa khasnada ha la sheego bal cida maamusha.

Wax kale oo ku jirta 36 bilyan oo Hantida la iibinayo ah, Hantidaasi waa tee ma gurigeena ku jira, mise waa madaxtooyada, mise waa bangiga mise waa xerad birjeex, markaa ha la cadeeyo hantida dawlada ee la iibinayo tii hore ayaan meelay martey la garaneyne, marka waa Wasiirku cadeysaa.

Waan soo dhoweynayaa inamada shaqaalaha in loo kordhiyo lacagta sida Xildhibaanadu yidhaahdeen, waxa kale oo aan soo jeedinayaa in Macalimiinta loo kordhiyo lacagta, iskuuladii dawlada ee umada ka dhexeeyay waa laga dareerey sababtuna lacag ku filan lama siiyo oo wax yar baa la siiyay.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa waxaynu leenahey xeebo aad u dheer dhibaatooyinka baa ka jira, iminka sun baa ka soo caaridey xarshow meel la yidhaahdo afar bilood bay tiil, afarta bilood xukuumadu wax war ah kama keenin, markaa waxaan soo jeedinayaa in Ciidanka Bada la kordhiyo oo boqol baa la kordhiyay laba boqol laga dhigo.

Waxa kale oo Miisaaniyada wax ugu jiraa Naafada lacag yar oo qadar ah, lacagtaasna waa in lagu daraa, hadii laga saareyna lagu soo celiyo, waayo naafadu waa dadka ugu jilicsan dadka waana dad u faro badan oo dadku ma dareensana, waliba waxaan soo jeedinayaa in loo kordhiyo lacagta oo lacagahaas Warshada Leydhka iyo Haamaha iyo waxyaabaha aan loo baahneyn ku jirta looga kordhiyo Naafada oo ah dad aad u jilicsan.

Waxa kale oo la yidhi Saxaafada lacag baa ugu jirta, markaa waxaan leeyahay waa in loo daayo hadii lacagta saxaafada laga saarey, waxa kale oo aan soo jeedinayaa in aad hoos loogu eego Shaqaalaha Golaha Wakiilada.

**Waxaan soo jeedinayaa ugu dambeyntii:-**

- Marka la yeedho Wasiirka oo lagu daro qodobadaas waa inaynu ansixinaa.

11. **Md. Ibraahim Axmed Haybe:-** (11min 52sec) Shir-gudoonka iyo mudanayaashaba waad salamantihiin, miisaaniyadi waxay ku dheeli tirnaataa oo ay amaan ku yeelataa waa in ay taabanaysaa nolosha dadweynahay, hadii aan doonayno, qaybaha ay sida muga leh u taabatay waxaa ka mid ah Caafimaadka, waxbarashada, beeraha, kaluumaysiga, Deegaanka, biyaha oo ceelal cusub looqodayo oo kuwii horana la dayar tirayo,wadooyinka, sidoo kale waxaa ka muuqda madaaro wax laga qabanayo , sidoo kale waxaa ka muuqda garoomo badan oo kuwii ciyaaraha ah oo qaarna la dayar tirayo qaarna la samaynayo ayaa

ka mid ah oo wixii bulshadu u baahnayd ayaa ka mid ah sidaa awgeed ayaan u leeyahay waa miisaaniyad wixii buldhadu u baahnaayeen oo dhami ay ka muuqato.

Meelaha ay gudidu taataabatay waxaan kala mid ahay xildhibaanadii hore ayaan kala mid ahay oo machad kii ay ka saareen waxaa uu la mid yahay kuwa hada jira ee ay ka midka yihii mihnadlayaasha caafimaadka, xoolaha waxaa uu la midyahay kuwa caynkaas ah, sidaa awgeed way u baahan yihiin in aqoontooda kor loo qaado xaqna waxay u leeyihiin in ay miisaaniyada ka muuqdaan oo wixii lagu kaalmayn karo lagu kaalmeeyo si ay aqoon u helaan oo cabashada saxaafadu u yaraato waxaanan ku talinayaa in miisaaniyada lagu soo celiyo oo aan laga saarin sida ay gudidu sheegtay.

Waxaa kale oo aan looga hadlay cashuuraha oo ay guud ahaanba ka saartay gudidu miisaaniyada kuma waafaqsani oo waxaan ka helnaa waa cashuuraha kuwa meesha ku qorana waa qaan aan ahayn daruuriyaad qaarna waa qaar nolosha taabanaya, waxaanan aamin sanahay wixii nolosha taabanaya in sideeda loola macaamilo oo wax laga daayo iyo wax cashuurta laga dhimo aan ka dhigno.

Waxyaaba ay ka midka yihiin Dawooyinka la is mariyo, sigaarka iyo baabuurta yaryar ee lagu xaragoodo wax ay ina yeelaysaa in cashuur la saaraa ma jirto waa wax yaaba dheeraada dadkana ma wada saamayso ee in laga saaro ma ogoli, waxaa kale oo jira cashuuro loogu soo talo galay Cawska oo kale taana waxaa soo jeedisay wasaarada Deegaanka oo kale waxay uga jeedaana waxaa weeyi doogii ayaa lawada ootay oo xoolihii meel ay wax ku cunaan ayay laayi'iin si taa loo baabiiyo labaa meesha timid in dadka la xidhxidho iyo in culays yar la saaro si loo joojiyo taas u jeedaduna taas ayay ahay oo loo baabiiyo arintaa.

Waxaa kale oo jiro dalkeenu waxaa uu u baahan yahay in warshado si dhaqaaluhu uu u kobco oo la sameeyay warshado saabuuneed oo saabuuntii wadanka ay ka jabnaato tii dibada inagaga imanaysay saw micneheedu maaha horumar lama samayn, si taa loo joojiyo oo loo dhiiri galiyo warshadaha dalka waa in cashuurta laga yareeyaa kuwa dibadana lagu kordhiyo waa mid loo baahan yahay oo ta dalkana laga dhimo ayaan haboon.

Waxaa kale oo aan looga cabanayaa sixirbararka, waa mida hore e miisaaniyadu makeento ee waxyaaba kale ayaa keena ee wixii kale ee keenayay hala eego, hadii aad eegto waxa uu hoos u dhucu ku yimid waa shilinkii ee waxaan taageersanahay xildhibaankii sheegay in dhamaan cashuuraha lagu bixiyo shilin Somaliland oo la joojiyo dollarka lagu bixinayo waayo waxyaabihii maalinwalba la isticmaalayay waxay noqonaysaa dollar, waxaan soo jeedinayaa in dhamaan waxyaabaha la iibsanayo laga dhigo Somaliland shilin.

Dhanka baananka dhamaanteen mushahar ayaynu qaadanaa oo baanka ayay nu ka qaadanaa waxaana jooga nin sarisle ah ayaa jooga waxaanu ka joogaa

shirkad fasax ayaana loo siiyay inuu halkaa fadhiisto oo marka aad qaadato mushaharka inuu halkaa kuugu sarifo lacagtiiba adiga oo aan bangiga kala bixin waan in la joojiyaa arinkaa oo aanay taasi dhicin oo bangigu sarifaa lacagtaa.

Waxaa kale oo jira Zaad iyo E-dahab oo socda iyagana waa in dib loo eegaa arinkooda oo shilinkeenii oo dhami halkaa ayuu galay oo lacagteeniiba meel ay taalo ma ogin, laba arimood labadanba dhaqaalaha dalka xil ayaa inaga saran oo dhaqaalaha dalku labadaa meelood ayuu ku jiraaye maxaa laga hayaa oo bari ka maalin hadii la yidhaa way keceen maxaa la yeelayaa Somaliland hantideedii oo dhami wey lumaysaaye waa in wax laga qabtaa.

Waxaa kale oo jira in baankeena hawlihiisa shaqo loo madax baneeyo waayo wuu garbbo duuban yahay oo lacago adagi kuma soo dhacdo waayo waxay ugu soo dhici wayday inaga ayaa ka horjoogna oo baanankii aduunka ee la shaqayn lahaa lana macaamili lahaa ayaan siidayn laanahay, waa in baanankaa la sii daayaa oo ay shaqeeyaan oo LC laga furan karaa baanankeena.

Baananka islaamku wey wanaagsanyihiin wanan mid sharciya laakiin ma la eegay dulsaarka ay ka qaadaan dadka iyo inta ay tahay ma la eegay, ha macaashaan macaash waa loo ogolyahay laakiin macaash intee leeg ayay qaadaan waxay qaadaan 13% iyo 12% ayay qaadaan taasina maaha in lagu eego umada ee waa in loo xadeeyaa macaashka. Tusaale ahaan hadii aad lacag ka amaahato oo aad guri ku dhisato oo aad lacagtii mudada laguu qabtay ku bixin weydo way xaraashaan gurigaagii taasi ma mid haboonbaa waayo duruurfo ayaa iman karee, sow in dib loogu dhigo ama dib loo eego maaha iyaduna waa mid aan jirin, labadaa baan ee lafuray waa in arimahooda dib loo eegaa loona fiirsadaa oo dadka hunguriga ayay hayaane waa in wax laga qabtaa.

Waxaan ku soo gabogabaynayaa waxaan raacsanahay taladii la soo jeediyay ee ahayd miisaaniyada inteeda kale aan ka doodno degdegna aan u galno tii goleheena waad mahadsantihiin.

12. **Md. Ibraahim Caraale Cabdi:-** (14min 7sec) Shir-gudoonka, Xidhibaanada sharafta leh, saxaafada iyo Shaqaalahaba ASC, salaam ka dib, run ahaantii Miisaaniyadan Qaranka ee 2016ka ee horteena taal waa miisaaniyad dheeli tiran sida uu sheegay xidhibaankii iga horeeyay oo la galiyay hawl aad u badan, sidaad ka warqabtaan Miisaaniyada Guddi baa u xilsaaran iyagoo tii horena la eegaya aad, Golaha Wasiirada la soo mariyaa, ka dib Golehaanaa la keenaa oo Gudidda dhaqaalaha ayaynu u dhiibnaa, run ahaantii laxadaad ama deymooyin yar yar mooyaane miisaaniyadu, waa mid dheeli tiran oo qurux badan.

Qodobo yar oo kooban baan rabaa inaan ka hadlo, ugu horeyn waxa miisaaniyada ka muuqata korodh 13% ah oo ka badan tahey Miisaaniyadii ka

horeysay ee 2015kii, waxaana ka muuqata in Wasaarada walba Miisaaniyadeeda korodh ku jiro, Korodhkaas waxaa ka mid ah Golaheenan Wakiilada.

Laba meeloodba Golaha waan ka hadlayaa, tan kowaad Shaqaalaha Golaha Wakiilada oo miisaaniyadooda ay ka muuqato in wax cayiman loogu darey, waxaan soo jeedinayaa waxaa cayiman ee shaqaalaha Golaha loogu darey Miisaaniyada Qaranka in sidooda loogu qeybiyo oo aaney noqonin wax faro dhexdood ka baxa.

Qodobka labaad, Miisaaniyada Golaha waxaa ku korodhay lacag dhan 5 bilyan ah, xildhibaan iga horeeyay sidu soo yidhi si aaney u noqon arrintaasi waxaa jiheysneyn waxaan soo jeedinayaa in Maalin Golaha inta albaabada loo xidho fadhi xidhan isla markaana lagu maamulo qaabka Miisaaniyada kordhay loo dhigayo.

Arrinta saddexaad, Machadka loo dhisayo xarun Saxaafada wax lagu baro ee loo dhisayo Ururka saxaafada ee SOLJA oo Miisaaniyada loogu soo darey qadar yar oo kooban, waxaan soo jeedinayaa in sidiisa loogu daayo oo aan laga saarin waxaana khilaafsanahey soo jeedinta Gudiddu kaga saartey, waxana taageerayaa in machadka loo dhiso Saxaafada.

Waxa kale oo aan ka hadlayaa oo aan is-dul taagayaa waxaynu nahey dal yar oo soo kooraya oo dhaqaalihiisu isla liito, waxa dhici karta marka mushkilada timaado iyadoo aan daraasad iyo cilmi baadhis la sameyn in eeda la saaro meelo eedo laheyn, waxaa ka mid meelaha eeda la saaray sicir bararka laga hadlayo in loo baxsado in la yidhaahdo bangi bangiyada ka mid ah oo ribada qaada ayaa mushkilada inaga saaraya, waxaynu nahey dad muslimiin ah baynu nahey, ilaahay oo gaalka iyo inagaba ina abuurtey ee uga aqoon badnaa adoomihiisa maslaxadooda ayaa yidi ribo laguma liibaano, wax loo baxsadona maaha, dalalkii muslimiinta ah ee ku dhaqmey bay dhaqaalohoodii baabi'isey, anigu waxaan leeyahay machad buu leeyahey oo loola tagi doonaa oo laga hadli doonaaye war dad muslimiin ah baynu nahee yaan lagu dabrin, waxaad moodeysaa in wax badan kuu kordhayaan laakiin arragtida saxda ahi waxa weeye in wax badan kaa dhaceen, waayo ilaahey baa sheegay cid wax tiraahda ugu saxsan.

Anigu Gudiddii Xeerkaa Baanka loo saarey baan ka mid ahey, culimada wadanka oo dhan baan la soo kulanahey maxsuulkii ka soo baxayna waan idin horkeeni doonaaye, markaas dee ama wuu idin jiidhi ama hadalka ilaahey iyo waxay culimadu soo jeediyeen baynu qaadan doonaa, markaa arrintaasna markeeda ha lala sugo, ilamana ah inay sicir barar daweyneyso, anigu waan taageerayaa in Bangiyada Islaamiga ah hadey wax ka khaldan yihiin in la saxo, laakiin in ribo sicir barar lag daweeynayo ma jirto.

Miisaaniyada waxa lagu soo darey Tacriifado la kordhiyay, Gudidda dhaqaaluhuna markey Miisaaniyada dib ugu noqotey sheegtey, waxaan Soo jeedinayaa anigoo waafaqaya soo jeedinta Gudidda dhaqaalaha in wax tacriifad oo lagu kordhinayo cashuur noocey taheyba laga saaro Miisaaniyada, waxaana leeyahey hadii tacriifadaha la kordhinayo maaha Wasaarada Maaliyadu Miisaaniyada ku soo darto, waa in loo keenaa iyadoo Xeer gaar ah oo aynu kala saarno waxaynu diidno iyo waxaynu ogolaanoba, laakiin hadii lagu soo daro Miisaaniyada waa khalkhal lagu sameynayo Miisaaniyada.

Waxa kale oo hoosta ka xariiqayaa oo jira rag baa leh warshedaa la sameeyay oo keeraa la sameeyay, dee warshada la sameeyay ee wadanka gudihiisa aan waxbaba ka istimaaleynin oo wixii kartoomeysan keeneysa oo hadana rabta in cashuurtii laga daayo warshed maaha taasi waa Monoply weeye, iyada laftigeedu cilmi baadhis bay u baahan tahey, saabuuntii oo kale boodharkii bay keeneysaa cadarkii lagu darayay bay keeneysaa oo intii la isku darayay intey wada keento aaney dalka waxba ka isticmaaleyn taasi warshed maaha, sharaabka ka mid, dawladuna cashuur bay ka heli jirtey, dadkii baayac mushtarka ah ee ku tartamayayna meeshii way ka baxeen, markaa kuwaasna waa in daraasad cilmiyeed lagu soo sameeyo, lama rabo nin afar daasadood intuu keeno yidhaahda warshed baan sameeyay oo dawladiina cashuurtii kuweydo, shacabkina ku baratamayayna meesha ka saarta.

Qodobka kale ee aan tilmaamayaa waxa weeye, laba arrimood oo aad in badan xildhibaano taa-taabteen waxa weeye lacag loo qoondeeyay oo 1.3% ah wax aad u yarn ah oo lagu tilmaamey inay tahey iibinta Hantida Qaranka, waxaan markaa cadeynayaa horta iibinta Hantida Qaranka yaa ka masuul ah, dalka waxaa uga masuul Xukuumada.

markey xukuumadu uga masuul tahey sharcigu wuxuu cadeynayaa inay iibin karaan, bixin karaan isla markaana kireyn karaan, hadey iibiyeen oo salaaxiyaadkii iyo awoodii ay lahaayeen isticmaaleen hantidiina ku soo dareen Miisaaniyada aniga waxay ila tahey waxa laga gardaro, maaha xukuumadu dad qeyru masuul ah oo guryihii iyo hantidey dhisayeen iibinaya, oo iibinaya madaxtooyadii iyo Golaha Wakiilada, maaha in loo hadlo oo masalan Xildhibaanka halkan ka kacayaa isagoo si dadban u hadlaya yidhaahdo dalkii bay iibineysaa ee waa inuu xukuumada jirta wax u qiro, xukuumadii horeba way iibin jirtey miisaaniyad kuma soo dari jirin meel ay martona mey sheegin jirin, halkana lagu soo darey oo waxaa la yidhi waa hanti qaran oo la iibinayo, wixii loo arko in la iibiyo wax kale oo ka qiimo badan bay xukuumadu ku badaleysaa, cidda shaqada lehna isaga garanaya halka uu iibinayo, hadaad tidhaahdo halkee baad iibineysaana dee cid kale shaqadoodii baad dalbaneysaa.

2% Gobolada Bari oo ka mid ah Gobolada aan anigu ka soo jeedo oo dee xisaab xidhkii sida 2% loo isticmaaley keena xaq baynu u leenahey, laakiin waxaad ka

soo qaadaa in la isticmaalo oo maalinba markey shaqadu soconeyso 2% waa waxyaabaha ugu horeeya, Gobol aan la dhisin ma jiree waxaas la sii jiidayo ma cirkaa laga keenay, dee circa lagama keenin waxaa la dhisayo ee la qabanayee waxa weeye Dawladaa qabatey oo waxay ku qabatey 2%kaas, xisaabta uu u baahan yahay inay ka badato mooyee ka yaraan meyso, taasna waxaan leeyahey war nimanka iska fadhiya-----------, laakiin yaan la odhan waxba lama qaban, waxa la qabanayo bari baa ugu badan, wadadda ugu weyni ee maanta qaranku la tiicayo Bari bay ku socotaa, markaa 2% rag baa soo jeedinaya ka soo jeeda Gobolada Barri in la laalo, markaa hadii wixii dadkaaga loo gooyay la joojiyo dadkaagii maxaa wax loogu qabanayaa.

Ugu dambeyn, Wasiirka Wasaarada Maaliyada Waxaan ku hambalyaynayaa wakhtiga ay soo gudbiyeen Miisaaniyada oo ah Wakhti ku haboon oo aan la gaadhin sanadkii la isticmaali lahaa, waxa kale oo aan ku amaanayaa korodhka 13% ka ah ee ku dareen Miisaaniyada taas oo ku timi karti iyo hawl dheeraada ee aan iska iman, waana Miisaaniyad haboon inaynu ku taageerno oo nidhaahno waa miisaaniyad wanaagsan, markaa Wasiirka Maaliyada Marwo Zamzam Cabdi aadan Hamblayo balaadhan baan u dirayaa oo waan u mahadnaqayaa.

**Waxaan gaba-gabadii soo jeedinayaa:-**

- In Miisaaniyada Qaranka ee 2016ka la ansixiyo loona ansixiyo sideeda marka lagu kabo qodobadaa aan kor ku soo sheegney oo rag badanina taabteen, Wabilaahi tawfiiq.

13. **Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** (11min 46sec) Bismilaahi raxmaan raxiim, Gudoomiye anigu waxaan ka hadlayaa saddex shey, Miisaaniyada lafteeda waan ka hadlayaa, inflation-ka waxa la yidhaahdona waan ka hadlayaa, Baananka lagu dheeraadeyna waan ka hadlayaa, waxaan taageerayaa ragii soo jeediyay Miisaaniyada Cashuurta cusub ee la kordhiyay in laga saaro, waayo inflation kordhay, wax korodh rag badan soo jeediyay in intaa la kordhiyona waa kharash inflation-kii jirey, inflation-ku waa cudur aan dawo laheyn, markaa anigu waxaan soo jeedinayaa yaan la kordhin waxba, cashuurtana ha laga saaro.

    Haamaha shidaalka iyo Hay'addaha kale oo inagu aynu meel iska taagney oo aan aheyn Hay'addo dawladeed ee la privatize-gareeyay ha laga saaro Miisaaniyada yaan lagu soo darin.

    si aynu u ansixinona waxaa wanaagsan in aynu wasiirka keeno oo nidhaahno ka jawaab waxyaabaha ay ka mid tahey Khasnada Guud, khasnad dhexe ayaa la yidhaahdaa oo waa account daboolan oo sabad baa ku xidhan waxa ku jira iyo sida loo maamulayo la garan maayo, waxa weeye xaq baynu u leenahey inaynu lifaaq inaynu raacino ka dib markeynu wasiirka weydiino wixii in la cadeeyo u baahan.

Iibka Hantida Qaranka ee laga Hadley, intee la iibiyay, maxaa ka soo baxay, musuq-maasuq intee la xadey, maxaa ka soo baxay, waxaas oo dhan ma heyno, marka la leeyahey hanti qaran baa la iibinayaa waa inaynu xildhibaano ahaan caqligeena ku darnaa war maxaa soo baxay, waxaa la sheegayaa lacago $33 milyan oo dollar ah oo la xadey oo dibadaha lagu qabtey, maxay ahaayeen, qaar baa kiinya lagu qabtey waa la sheegayaa, waxay taheyna garan meyno, markaa waxaan soo jeedinayaa inagu waa inaynu iskaga mid noqonaa in Hantida Umada la ilaaliyo, wasiirka ha la keeno si aynu wixii mugdi inaga jiro u weydiino ka dibna aynu ansixino, intaas ayaan Miisaaniyada kaga baxayaa.

Xaga Sicir barar (Inflation), sicir bararku maanta aynu joogno waa hawl yar tahey sida loo fahmaa oo ma adka, dollarka laftigiisii ayaa noqdey alaab laga baayac mushtareeyay, iminka Bangiga dhexdiisa ayaan $1 dollar waxaan ku iibsanayaa 8,000 sl sh/= hadaan is idhaahdo ka iibina, 7,500 sl sh/= buu iga siisanayaa, haduu ceynkaas **$20 milyan oo dollar** ku waxeeyo ama yarba waxaa ugu jirta **$1 milyan oo dollar** baa ugu jirta, wax ka macaash badan oo ka hawl yar ma jirto, sidaasey labadii Bangiba ku shaqeeyaan una naxariisan maayaan dadka waayo waa dad macaash badan u bartey, waxaynu soo dejinayno iyo waxaynu dhoofinayno (import iyo export), Waxaynu dhoofineynay waa xoolo, xoolihiina nin waliba gacantiisu ku dhacey, xabishada hadaad tagto 1 dollar hadii lagu arko waa xadhig, aduunka lacag dabada mareysa ma jirto ee dollarku wuxuu yaal Central Bank, markaa waa inuu awood u heesho central bank inuu hayo lacagta dollarka ah.

Banking system-kii Qaran waa baananka, 10 baan baynu helaynaa, waxaynu ku xidheynaa baananka ganacsiga ah inuu Bangiga dhexe furo oo aynu ku khasbeynaa, bangigu wuxuu furayaa ictimaal, lacagtani qiimey yeelaneysaa markeynu waxeena ictimaal ku xidhno oo ictimaal isticmaalno oo markaasey sicir bararku dhacayaa oo dhulka tagayaa, markaa waxaan soo jeedinayaa aynu ciyaarta ka deyno oo aynu sii Deyno Baananka Ganacsiga oo aynu ku shaqeyno banking system mid ganacsi iyo mid islaamiyaba.

Bangigu wuxuu ku shaqeeyaa lacagna waa la dhigtaa, lacagna waa laga qaataa shaqadiisu waa intaas, laakiin LC-ga ictimaalka ayaynu isticmaaleynaa oo waxaynu dhoofineyno iyo waxaynu soo dejinayno waa ictimaale markaaseynu lacag helaynaa, markaa Central Bank lacag alaale iyo lacagtii dollar aheyd ee adhiga ka soo baxda waa inuu isagu hayaa, lacagta dawlada ka soo baxda waa inuu isagu hayaa, lacagta foreign aid-ka waa inuu hayaa, waxaan leeyahay waa in Banking system-ka markaa la ilaaliyaa.

Waxaan ku soo ururinayaa sicir bararkaas oo dhan bangi la'aan, hadaan bangi la helin wax alaale iyo wax soconayaa ma jiraa, aynu iska deyno ciyaarta iyo isyeel yeelka.

Waxaa naloo saarey Guddi wadaadku wuu ku jirey, ana waan ku jirey, waxaanu la kulaney Wasiirkii diinta oo aanu la doodney, waxaanu aragney culimadii oo aanu la doodney, inuu wax soo celiyaa bay aheyd ee wuu ku fadhiistey, Markaa gudoomiye arronta laga bilaabo waa inaad tidhaahdo keen oo ha soo dhigo oo ha sheego wixii na loo sheegay, waan ka baxay.

**14. Md. Maxamud Jaamac Cilmi (Dable):-** (20min 51sec) Shir-gudoonka iyo mudanayaashuba waad salaamantihiin manta waxa ugu mihiimsan ee aan ka hadlaynaa waa miisaaniyada Qaranka iyada oo aan cidna aan lagu xumayn maayo ee waa la hagaajinayaa.

Marka ugu horaysa Guddida dhaqaalaha waxaan weydiinayaa hal su'aal markii ay ahayd lida 6,000 Kun, 44malyuun ayaa naaqusa oo ay ku jirtaa naaqus halkee loo raacayaa? Bal xisaabiya oo maalintaa 6,000 ayuu ku fadhiyay maantana 9,000 ayuu marayaaye xisabiya, waxay noqonaysaa 46 milyan oo waxay u tagtay kii kugu kordhiyay sixirbararka markaa halkee laga doonayaa lacagta intaa leeg? Yaase loo raacayaa lacagta intaa leeg? Waana halkaa meesha u baahan in la is dultaago.

Waxaa kale oo meesha taala cidwalbana inooga xaqlihi waa ninmankaa shaqaalaha ah lacagtaa loo kordhiyay ee dhiiri galinta nimankaasi dulmi ayay tirsanayaane mushaharkooda ha loogu daro oo halaga daayo gunadan la sheegayo waayo gunadan waa lagu ciyaarayaa sexeexdanbana ayay galin **(secondment) xildhibaanad.**

Waxaa kale oo jirta arimaha laga hadlay ee ah masaa'ibka wadanka ka jira ee loo saaray intaas oo hay'adood in wax laga qabto dollar-ka waxay noqotay arin ilaa hada aan wax laga qaban iyada oo aanay dad badan loo diray oo isugu jira mufakiriin iyo dad kalaba, masiibada wadankuna waa Zaad-ka waxaanan soo jeediyanayaa arintaa saadka in Goluhu go'aan ka soo saaro oo lacagta Zaad-ka lagu isticmaalo Shilin oo aan go'aan ka gaadhno arinkaa.

Dhanka kordhiska ciidamada iyo shaqaalaha waxaan leeyahay lacagaha yaala ee kaydka ah waa in looga kordhiyaa, lacagta Haamaha iyo korontada loo kordhiyay ee halka ku qoran ma wax loo kordhiyay baa mise waa mid iyaga laga rabo taasina waa su'aal u baahan laakiin aanan garanayn cida aan weydiinayo hadii ay tahay lacag loo kordhiyay sababta loogu kordhiyay? Iyaga oo dadka lacag ka qaada?.

Gudoomiye marka wax ladoonayo in la kordhiyo waa in labada dhinac isla qaataan waayo guddidu waxay sheegeen in ay wasaarada ku celiyeen ana ma wasaarada ayaan ku celinaa waxaanu doonano in aan idin weydiino.

Minishiibiyada iyo dawladaha hoose horta sharcigu waxa uu yahay may samayn jirin ilaa anaga ay noo keenaan miisaaniyad oo ay sheegaan miisaaniyadu waa taa kharashaka aan kordhinayna waa kaa ilaa ay yidhaahdaan, waana in ay gudidu keentaa wixii ay sameeyeen iyo waxa ay siyaadiyeen inta aan buugalagu qorin, dowladaha iyo hay'adaha ku jiraa waan in ay u keenaan miisaaniyadooda iyo kharashaadkooda gudida mana aha in laga qaato buuga miisaaniyada oo kaliya.

Hay'adaha dawliga ahi waxay bixiyaan lacag lacagtaasina waxay ku dhacdaa dahabshiil iyagaana iska qaata kumana taalo buuga waxaana la doonayaa in ay gudidda dhaqaalaha iyo wasaarada maaliyadu ay cadeeyaan oo wixii dhaqaale ah ee soo gala waa in ay ku dhacdaa wasaarada maaliyada oo dabadeed miisaniyada laga muujiyaa.

2% aan maqlaynay ilaa ina cigaal alle ha u naxariistee meel allaale meel ay ku danbeeyeen lama yaqaan waana mid aad loogu baahan yahay in siwanaagsan oo sharaf leh gacanta looga galiyo kabku waa mid aad u mihiim ah waana mid ku yaala Dastuurka waana xaquuq ay leeyihiin dawladaha hoose waayo waa waxay wax ku qabanayeen. Waana mid aad u mihiim ah kabkaa siday tahay loo siiyo khaasatan gobolada bariga waayo dakhli kale malahan.

Arinta bangiga waa in bangiga dhexe masuuliyad iska saaraa bangiyada kale ee wadanka laga samaynaayo, isgaana laga rabaa in uu soo gudbiyo wixii jira halka aan inagu uga doodeyno kuwo aan jirin waayo 100 dollar waxay kaa jarayaan 13% halkee lagu arkay taas markaa saw kuwa kale ee yimaadaa dariiqaa uun raaci maayaan ayaa kaa qabanaya, markaa inta aan bangi kale la furin waxaa ka fiican in bangiga dhexe u sameeyo xag oo uu masuuliyadeedana uu qaado.

Waana in uu keento cida ku shaqada lihi oo kalmada aan isku hayno la badalaa oo uu halka la leeyahay waa khidmad iyo waa rubo uu isagu soo kala saaro oo.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa arinta halkan aan joogno in 5 nin loo saaro dabadeed la qaybiyo sidaana aan ku kala faataxaysano. Arinta ku saabsan cashuurihii siyaadada ahaan waan ku taageersanahay waana arin ay ku amaanan yihiin ee ay guddidaasi qaadatay waxaanan soo jeedinayaa sidaa ay gudidu u soo dhigtay in loo qaato, intaa ayaan ku soo gabogabaynayaa.

**15. Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** (11min 7sec) Shir-gudoonka iyo mudanayaashuba waad salaamantihiin ugu horayn waxaan taageersanahay in shaqaalaha woxooga loo kordhiyay loogu daro mushaharka sidaa uu xildhibaankii iga horeeyayba sheegay ayaan soo jeedinayaa,

Waxaa kale oo aan doonayaa in aan ka hadlo arinta sixirbararka hadii aan eegno waxaa jira taariikho hore oo jiray dawlado hore ayaa ku burburay sixirbrarkaa

waxayna ahayd intii dagaalkii 14 waxyaabihii dhigay dagaalkii jarmalka waxaa waxaa ka mid ahaa lacag la daaboco oo aan lahayn, waana lacagta receve ka ah ee baanka taala ee hadii lacagta baanka taala ee hadii lacagta wadanku kacdo lagu kaabo.

Waxaan dareen sanahay ilaa dawladihii hore ilaa tan imika joogta wasiirka maaliyada mooyaane ay lacag soo daabixi jireen lacagtaa la soo daaboco oo khatarteeda leh waana ta sababta sixirbårarka, sababta oo ah lacag aan la hayn wax lagu kaabo marka uu shilinkeenu hoos u dhaco, dabadeedna la kaabo isga oo lacagayawga reserve ka noqonaya aan qaadano waana mid aan ku amaanayo wasiirka maaliyada in aanay jirin lacagtaasi oo ay joojisay.

Waxaa kale oo aan tilmaamayaa baanaka la furayo ee la leeyahay waxaa la samaysanayaa baan waa mide ilaa inta la inaga aqoonsanayo ma jirto bangi weyn oo commercial bank ah oo imanayaaye ayaan midaa la isugu sheekayn kan hada laga hadlayaa ama baankeenu wataa waa baanan dilaaliin ah oo jabuuti ku yaala mid wax inoo kordhinayana ma aha ee taa ha la ogaado.

Laba shay ayaan halkan ka sheegayaa marka hore waa digniin dahabshiil ha u tagto salaama ha u tagto, hadii aad gurigiina hagaajin weydaan sharci ayaan idinka soo saaraynaa wanan xadidi doonaa macaashka aad qaadataan, waxanan idin leeyah markii wadankan la soo galay lacag maydaan haysan, maantana alle waa idiin barakeeyay oo lacag fiican ayaad haysataan u naxariista umada oo sida uu quraanku sheegayo sameeya.

Waxaa kale oo laga hadlay lacag dhigaal ah oo wadanka u taala, waxaan leeyahay hadii ay lacag dhigaal ahi wadanka u taalo waa wax wanaagsan oo dawladu waxay ka kaaftoomaysaa in ay lacag amaahato, wadanka hadii ay baanan yimaadaan oo dawlada dayn lagu yeesho musalaf ayaynu noqonaynaa ee taa ayaan waxba loo dhagtaagin ayaan leeyahay.

Lagactaa dhigaalka ah ee taala anigu ku talin maayo in la isticmaalo, laakiin waxaan ku talinayaa lacagtaa  mashaariic wax soo saar halagu fuliyo, waxaa kale oo jira wadamada lama cashuuro waxyaabaha la dhoofinayo ee la cashuuro waxyaabaha soo degeya in kastoo aynaan wax kale oo la cashuuro aynaan hayn waxaan leeyahay hala dhiiri galiyo waxyaaba wadanka ka soo baxa.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in la cashuuro waxyaabaha dibada inooga imanaya ee aan faa'iidada inoo lahayn waa in cashuurta lagu kordhiyaa, waxanan soo jeedinayaa in miisaaniyada la ansixiyo waanad salaamantihiin.

**16. Md. Wali Axmed Xaawo:-** (2min 1sec) Shir-gudoonka iyo mudanayaashuba waad salaamantihiin wasaarada maaliyada ee keentay wax duuduuban oo aad sharaxaad badan lahayn kolay meeshan kuma fiicana ee waxaa haboonayn in la soo faahfaahiyo waana muhiin in wixii su'aalo ah ee meesha ku laaban ay ka

jawaabaan inta ay golaha yimaadaan. Waxaa kale oo aan ku darayaa warshada laydhka iyo Hay'adaha gaarka loo leeyahay waxaa ugu jira miisaaniyad halkaana cadayn ayaa looga baahan yahay sababtu waxa ay tahay.

Waxaa kale oo aan aad u taageersanahay arinta shaqaalaha in gunadooda loogu daro Mushaharka waxaanan soo jeedinayaa cidii miisaniyada soo samaysay in aan wax ka waydiino oo halka loogu yeedho ayaan ku soo gaba-gabeynayaa, WSC.

17. **Md. Siciid Cilmi Rooble:-** (12min 3sec) Bismilaahi, Mahad ilaahay ayaa leh gudoomiye marka hore waxaan u mahadnaqayaa wasiirka iyo gudida ka soo shaqaysay miisaaniyada waayo awal inta halkan la inoogu keeno ayaa la ina odhan jiray duuduub ku ansixaya, waxaa kale oo aan u mahad naqayaa labada gudi ee aadka uga shaqeeyay miisaaniyada oo kala ah Guddida dhaqaalaha iy Guddida ilaalinta iyo Dabagalka hantida qaranka.

Waxaa kale oo aan sheegay ka gudi ahaan cida aan dhaqada wada leenahay in aan halkan ka sheego cabashadoodu waa mid waajib nagu ah, waayo waxaan gudidda iyo wasiirkaba ugu mahad celinayaa in ay dhagaysteen waxyaabihiin aan warbixinahayaga ku soo gudbinay ama aan halkan ka sheegnay ee ahaaa dhibaatooyinka haysta jeelasha iyo maxkamadaha oo miisaaniyada wax loo kordhiyay.

Waxaa kale oo aan guddida ugu mahadnaqayaa tacriifadaha oo ay sifiican oo waafiya ugu soo shaqeeyeen, waxaa kale oo aan ka hadlayaa waa laba qodob oo aad u mihiim ah mida ugu horaysaa waa arintan laga hadlay ee sixirbararka waa mide lacagta adag ee aan leenahay ee ay ahayd in ay ku xerooto baanka dhexe kuma xerooto ee waxay ku xerootaa Dahabshiil waana danbi weeyaan taasi oo ganacsatadeena ayaa maamulka iyo sixir goynta leh oo siday doonaan wax u maamula waana gaf sharciya ayaa leeyahay.

Qodobka labaad ee aan sheegayaa waxaa weeyi in aan go'aano raacino miisaaniyada oo aan isla meel dhigno oo ah mida koobaad ee 2% ah waa lamarin habaabiyay oo siday ahayd looma isticmaalo waxaan leeyahay ha la mashaariiceeyo oo aynu garano meelaha ay ku baxdo.

Waxaa kale oo jirta sida ay soo sheegtay gudidda ilaalinta iyo dabagalka hantida qaranku in la goboleeyo miisaaniyada halkana kama muuqato waana in la daadajiyaa oo ay gaadhi ilaa degmo.

Waxaa kale oo aan ka hadlayaa khasnada dawlada lacag badan ayaan ku jirta cid ay hoostimaadaana ma jirto ee waa in meel la hoos geeyaa, waxaa kale oo aan ka hadlayaa qodobkii ugu mihiimsanaa oo hadii aan nahay gudida cadaalada waxaa lanaga ilaaway maxkamada ciidamada waana mid dastuuri ah waana maxkamada 5aad ee dalka iyadaana ugu hawl badan, maxkamadaasi waa la dayacay gabi ahaanba oo gadiid malaha xafiisyo malahan, gunan mabalahan habayaraatee.

Waxaa kale oo jirna waxaan soo saarnay qaraar kaas oo odhanaya ayaan la iibin hadida qaran waxaanan aamin sanay in uu yahay xaaraan arinkaasi intaa ayaan ka baxayaa wanad mahad santihiin.

Waxaanan soo jeedinayaa:-

- In miisaaniyada sidaa lagu sii daayo iyada oo go'aamo la raacinaayo.

**18. Md. C/qaadir Jaamac Xaamdu:-** (4min 37sec) Shir-gudoonka iyo mudanayaashuba waad salaamantihiin guddida dhaqaaluhu inay wax soo qabteen oo soo dadaaleen layskuma hayo laakiin wakhti badan baa halkaa ku lumay, qodabadii muhiimka ahaa ee ay ahayd inay si fiican usoo cadeeyaan halkan inoogama muuqdaan sida 2% kii gobolada bari oo in badan soo noqnoqonaysay goluhuna dhowr goor ansixiyey madaxweynuhuna qaraar kasoo saaray, xataa in laba barnaamij loo sameeyo mashaariicaysan.

Barnaamijkaa mashaariicaysana waa barnaamij mustaqbalka wax weyn ugu fadhiyi doona, dooroshooyina waa la galayaa dadkaasina waa ogyihiin in 2% ku magacaaban yihiin sidii loogu talo galayna aanay u gaadhin, runtiina in habeeyo oo si fiican wax laysaga ogaado waa qodob meesha ku jira, dalkuna wuu u baahan yahay marka wax lagu magacaabo in sidii loogu talo galay uu u gaadho, taana waan soo dhawaynayaa oo mudanayaashii horaa ka hadlay, laakiin waxaan anigu soo dhawaynayaa taa uu madaxweynuhu ka dhawaajiyay ee ah in qaybna la mashaariiceeyo qaybna horumarin laga dhigo, labadaaba waan soo dhawaynayaa laakiin in lays dul taago waa muhiim.

Qodobka labaad ee bangiyada laga soo hadlay, baanku inuu dabran yahay waynu ognahay oo xeerar uu u dabran yahay xeerarkuu u dabran yahayna inuu golaha yaaliin waynu ognahay oo laga dooday dhowr goorna waa laga wada hadlay oo laga dooday xeerkaasina waa muhiin oo ansixino waliba ajendahan kowbuu ka yahee marka aynu miisaaniyada ansixino.

Tan kale ee dhiiri galinta waan la qabaa shaqaalaha golaha, shaqaaluhu waa mishiinka golaha kala socodsiiya in muhiimad gaara la siiyana waxaan la qabaa mudayaashii hore, halkaa dhiiri galintana loogu daro mushaharkooda.

Tii kale ee golahana in goluhu wada hadal xidhan arinkiisa ku dhamaysto, inkasta oo ay ahayd in guddidu halkan kusoo cadayso oo formuladooda la raaco markaa lagu hawl galo, arintaana inay sidaa u dhacdo waan soo dhawaynayaa, runtiina waxaan qabaa inay Wasaarada Maaliyadu dadaal badan samaysay oo runtii wada shaqayn dhow oo ladabada gudi ee gudida dhaqaalaha iyo gudida ilaalinta iyo dabagalka hantida qaranka.

Kormeerkii aanu gobalada aanu kusoo marnay si fiican bay wasaaradu noosoo dhawaysay soo jeedintii aanu soo jeedinay bay nala qaadatay oo ahayd in gobolada 5% la gaadhsiiyo, waayo hadii caasimaduun aynu joogno oo goboladii waxba gaadhi waayayaan hadhow dalku wuu soo laalaabmayaa, Africana inta badana caasimaduunbaa lagu soo dhuraa, markaa taasina waxay role siinaysaa

in goboladii intaa loo jaray 10% in looga dhigay ahayde laakiin waa bar bilowe intaana in sideedaa loogu dhameeyo, wasaaraduhuna ay xil iska saaraan.

Aad iyo aad baanan usoo dhawaynayaa wasiiradu dadaalkaa ay samaysay, waxaanan qabaa qodobadaa aynu isdul taagnay hadii sidooda loo habeeyo in miisaaniyada lasii daayo wabilaahi tawfiiq.

19. **Md. Maxamed Cismaan Maxamed (Bulqaas):-** (9min 16sec) Shir-gudoonka iyo mudanayaashuba waad salaamantihiin Waxaan rabaa inaan inyar yara iftiimiyo oo aan xaq u leeyahay inaan ka hadlo, runtii gudida dhaqaalaha ayaan ahaan jiray intii golahan jiray wax badana waan ka dareemayaa oo u baahan tafsiil oo loo baahan yahay in dadku fahmo oo loo sheego, hadaan soo qaato dakhliga dheeraadka ee miisaaniyada January ilaa October buuga miisaaniyada waxaa ku qoran 90 bilyan oo u dhiganta ilaa 15 milyan oo dollar, waa dakhliga dheeraadka ee sanadkan oo aanay ku jirin labada bilood ee u dambeeya ee November iyo December meelna kagama cada dakhliga guud ee miisaaniyada 2016 iyadoo waliba aanay ku jirin labadan bilood ee November iyo December.

Sidoo kale waxaa ku cad dakhliga guud ee miisaaniyada hadhaa khasnada dowlada oo 2014 ka yimi halka ay ku qoran tahay page 8 buuga miisaaniyad waa inuu kasoo wareegay dakhligaasi, miisaaniyada 2013 bay idhaahdeen 2013 ka maxaa 2015 u keenay sanadbaaba u dhaxeeyee 2014 bay ahayd inay soo gasho, lacagtaas halkay iska taal waana isku mid labadaas dakhli kii 2013 iyo 2014 markaa ma khalad mabdiciyaa dhacay mise 2013 iyo 2014 hadhaagii kasoo hadhay baa isku mida, waxaan u baahanahay in wasiirku halkan timaado oo su’aalaha la waydiinayana ay ka mid noqoto.

Sidaa darteen siday macquul u tahay dakhligii kasoo hadhay 2013 lagu soo daro miisaaniyada 2015 iyadoo laga dhigayo inay ka soo baxday dakhliga dheeriga ah ee 2014 waxbaa khaldan ee halkaa dib haloogu noqdo ayaan leeyahay.

Mida kale waxaa loo baahan yahay inay wasaaradu kala cadayso dheeraadka miisaaniyada iyo hadhaaga miisaaniiyada, waana laba option oo kala duwan dheeraadku waa surplus iyo hadhaaga hadhay ee wasaaradaha ka hadhay labadaa in lakala cadeeyo.

Dakhliga gadida hantida dowlada 36 bilyan baa ku qoran tafaasiil bayna uga baahan tahay waxaa la iibiyey waa sanadkii aynu soo dhaafnay ayay ku jirtay 2015 oo hanta la iibiyey ah tafaasiil taas laftigeeda waa loo baahan yahay maxaa la iibiyey.

Dakhliga haamaha shidaalka ee 2014 iyo 2015 waxaa u dhaxeeya dakhli aad u fara badan 2014 wuxuu ahaa 720 milyan iyo woxoogaa dheeraada ka 2015 kuna waa afar iyo afartan bilyan saddex boqol iyo laba iyo toban, lacagtaa dheeraadka ah ee intaa leeg halkay kasoo baxday waa in la helaa meeshay kasoo baxday ma kiradiibaa la kordhiyay ma haamihiibaa la iibiyey taas laftigeedu waxay u baahan tahay tafaasiil dheeraada

Qaadhaankii horumarinta gobolada bari ee soo baxay waxaa weeye 33 bilyan wax yarbaa ka dhiman almost 5.5 milyan dollar weeye, waxaanu uga baahanahay wasiirka inuu ka warbixiyo halka ay ku baxday iyo tafaasiisheeda, waxaanan aaminsanahay inaanay ku bixin sifihii loogu talo galay.

**Sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa**:-

- In buuga miisaaniyada lagu daro lifaaq ay ku cadahay sida loo maamulayo kharashkaa 2% ee gobolada Sool Sanaag iyo Buuhoodle, lifaaqaana ay ku qornaato in la sameeyo Guddi maamusha 2% kaas.

Guddidaas oo ka kooban Wasaarada Madaxtooyada, Wasaarada Maaliyada iyo guddi masuuliyiinta tirsan goboladaas sool sanaag iyo buuhoodle sida wasiirada iyo xildhibaanada iyo wixii la mida si loo helo transparent waxaa ay ku baxayso ee hadba laysla garto markaasay cadaanaysa sida ay u baxday iyo meesha ay martay, laakiin in cid gaara iska maamulato oo aan transparent ahayn ma garanayno anagana ay nagu magaacaban tahay haba lajaro hadii kale waa hafar nala hafrayee ama sida ay tahay loo maamulaa oo aanu maamulaa waa deegaanada aanu ka tirsanahaye.

Dhisida dekada laas qoray sida kan maydh oo kale waxaan soo jeedinayaa in lagu daro korodhka kharashka miisaaniyada 2016 budget ay miisaaniyada ku leedahay maadaama ay xukuumada balan qaaday sanadkii hore markii laga reebay mashaariicda SDF (Somaliland Development Fund) maydhna waa la siiyay taana waa laga reebay xukuumadaana balan qaaday markaa oo tidhi anagaa bixinayna calashaan dhanka amaanka haayadaha dhisaya awgeed, markaa waa in budget ka lagu daraa.

Arinta shaqaalaha golaha waan taageerayaa waa in gunadooda loogu daro mushaharkooda, arinta maxkamadahana ciidanka qaranka waxaan soo jeedinayaa in mushaharkooda loo kordhiyo sida loogu kordhiyay maxkamadaha kale ee caadiga ah, waayo sidaasay cadaaladu ku jirtaa waayo maxkamadaha ciidanka qaranku waa la mid. Anigu waxaan ku jiraa gudida cadaalada way noo keeneen cabashadooda waana la ignore gareeyey nimankaasi waa nimanka habeen iyo maalin mii iyo tuulo loo diro waxna ma qaataan xaqbay u leeyihiin in loo kordhiyo si ay uga badbaadaan corruptionka.

Miisaaniyada gobolada waa in la daadajiyo oola goboleeyo la gaadhsiiyaa, waana in 20% loo diraa gobolada sidaa ay wasaaradu ku talisay 5% waa in la kordhiyaa oo laga dhigaa 20% way fiican tahay markaasay wax u noqon kartaa.

Sida gudida dhaqaaluhu ku talisay dhamaan tacriifadihii la kordhiyay waa in la laalaa maadaamaa markii horeba sicir barar aynu ku jirnay.

Ciidanka bada miisaaniyada waxaa ugu jria 100 ciidana, waxaan soo jeedinayaa in 200 oo ciidana laga dhigo waayo way ku yartahay tusaale ahaan from maydh ilaa ceelaayo waa dhowr boqol oo kiiloomitir waxaa jooga ciidan faro ku tiris ah oo sodomeeyo ah aagaasna waxbaa ka jirjira xaga nabad galyada waa in loo kordhiyaa si ay u ilaaliyaan meelaha laga soo galayo wabilaahi tawfiiq.

20. **Md. Axmed Maxamed Nuur:-** (13min 25sec) Shir-gudoonka iyo Mudanayaashuba waad salaamantihiin, Runtii waxaan guddida dhaqaalaha ku amaanayaa tacriifadaha ay ka saareeen miisaaniyada waana mid loo baahan yahay, culays badanbaa dadka saaran hadii tan loogu sii darana waa isla bas beeli layd, hadaan taa ka gudbo waxaa jira sixir barar iyo dhaqaale barar sixir bararku halka uu maanta wadankeena ka maraayo waynu ka wada warhaynaa qof inaga mida aanu saamaynina ma jiro taana waxaa sababay xukuumada madaxweyne siilaanyo sababtuna waxay tahay dalku wuxuu leeyahay bangi dhexe oo lacagta isagaa maamuli jiray.

Waynu ogaynoo Dawladii Daahir Riyaale Kaahin dollarku halku inagu marayay waynu ogayd 620 marku u qaaliyoobo 670 buu ahaa maantana 800 iyo googo buu marayaa waxaa sababay taa waxaa shaqayn jiray bangiga dhexe oo lacagta adag ee uu qabtuu kula dagaalamayay lacagta qalaad in sarifkeedu uu kaco sababtuu intaa u dhaafi waayayna baankaa shaqaynayay oo lacagtii adag ee uu qabtay ayuu ugu diidanaa inuu dollar ku kaco oo suuqu galin jiray marka uu arko inuu sare u kacayo, halka aan ka leeyahay xukuumadanaa ka masuulana waxaa weeye baankii dhexe waxay ka kaxaysay oo ay ka faro maroojisay lacagti adkayd inuu qabto. Nin ganacsada oo dantiisa eegayana dhaqaale barar bay ugu samaysoo waxay tidhi dahabshiiloow lacagta qabo runtiina taas waa waxyaabaha sababaan u arkaa sarifku halkuu inagu marayo iyo sixirkuba, sababta aan u leeyahayna waaka masuulana waataas. Xalkana waxaan u arkaa waa laba qodob.

- Xukuumada oo madaxbanaanidii baangiga dhexe usoo calisa una ogolaata inuu lacagta adag qabto.
- Lacagteena oo wixii la cashuurayaba lagu cashuuro oo laga joojiyo lacagta qalaad ee lagu cashuurayo

Waxaa halkan miisaaniyada ku jira deeqo halkan ay hayado inagu caawiyaan sanad walba waynu ku aragnaa miisaaniyada lacag duuduba uunbaa layna idhaa intaasbaa laynagu caawiyay, waxaa haboon taa laynagu caawiyay meel ay gasho war uma haynee in miisaaniyada iyadoo mashaariicaysan lagu soo daro oo aan waliba soo jeedinayo tan hada in lagu daro lacagtaa in la jajabiyo oo mashaariic loo qoondeeyo waayo hadii kale lacagtaas meelay ku dhacdo la garan mayo.

Mudanayaal 2014 ee aynu ansixinay goaan gole ayaynu la ansixinay oo ahaa in miisaaniyada la daadajiyo oo wasaarad waliba miisaaniyada u qoondaysan ay sii jajabiso oo gobol waliba halkaa ka daalacdo wasaarad hebla waxaa miisaaniyada ugu jira, taasi may dhicin tana waxaan leeyahay wasiiradu waxay inoo sheegtay in 5% uun wasaarad walba loo qoondeeyey taana waxaan leeyahay ugu yaraan 20% in loo qoondeeyo waayo lacagtuba hargeisa iyo xarunta wasaaradaha waa lagu qatan yahay gobolada waxaa ka gaadha waa mushahar iyo waxaan macno lahayn oo kharasha.

2% gobolada bari markaynaan indhaha iska ridayn goboladaasi waa dulman yihiin lacagtaasuna waa xadkii halkaana ka tagay halkana aan soo gaadhin umadiina waa cashuur saaran wax alaala wax goboladii bari loogu qabtayna ma jirto maahmaahbaa waxay ahayd abaskuul meelna ma wada seexan warna isuguma seegana, goboladaas waa dulman yihiin lacagtoodiina meel alaala meelay martay la garan maayo.

Tan imika waxaan leeyahay intaanay gacanteena ka bixin waa in wasaarada maaliyadu ay soo mashaariicaysaa oo intaynaan miisaaniyada gudbin wasaaradu guntiga dhiisha isaga dhigtaa oo soo mashaariicaysaa hadii kale tana wuxuunbay maraysaa halkii kuwii hore inta sano ee 2% miisaaniyada ku jiro cidna waxba loogu qaban waynu ka wada war haynaa, arintaa wax halaga qabto ayaan leeyahay gole ahaan.

Haamaha shidaalka berbera, warshada laydhka berbera, warshada laydhka hargeisa iyo biyaha boorama intuba waa private miisaaniyada halaga saaro wixii ugu jira meel umadu lahayd oo hadana miisaaniyad la siinayo waa meel ka dhace.

Ciidanka xeebaha ee 100 ku ugu jiraan mudanayaal badanbaa ka hadlee anuu waxaan leeyahayba 300 halooga dhigo waayo duruufo badan baa inagu gadaaman xeebtuna way dheertahay ciidanka joogaana ciidan ku filan maaha taana waxaan leeyahay haloo kordhiyo oo 300 haloo dhigo ayaan soo jeedinayaa.

Hadaan usoo noqdo tan shaqaalaha, shaqaalahani way cabanayaan waxaanan la mid ahay oo aan taageerayaa mudanayaashii hore oo payroll ka ay mushaharka ku qaataan haloogu daro intoodaa, waayo waa muhiim

Dalka naafo badan baa jirta, naafadaasi waa dad nugul waa dad aan shaqaysan karayn miisaaniyada qarankana in lagu ilaaliyo oo lagu ilaaliyo waa muhiim, intan miisaaniyada ugu jirtaana wax ku filan maaha ee tan khasnada inooga buuxda halooga kordhiyaan leeyahay kolay filaansho la heli maayee wax inuun gaadh gaadha halooga kordhiyaan leeyahay

Wasaarada waxbarashada waxaan miisaaniyadeeda ku arkaayay dhowr iskuul oo boodhin ah oo 3 dugsi ka kooban in lacagi ay ugu jirto miisaaniyada, waana wax wanaagsan dhaqaale badan buu u baahan yahay gacan qabasho badan buu u baahan yahay waanan ku amaanayaa wasaarada, waxaanan isleeyahay way ku yartahee haloo sii kordhiyo. Waxaa jira school boodhin ah oo oodweyne waligiina ahaa bari dhawaydbaa dib loo furay wuu shaqeeyaa maaha dugsi private ah ee waa dugsi dawli ah schoolkii caynkaa ahaa anoon odhaahdaydu aanay ahayn schooladan kaluu ka hinaasay wasiiradan maaliyaduna ay tahay wasiiradii hore ee waxbarashada waxaan is waydiinayay imika miisaaniyadan golaha loo qaybiyayba gobolkan daad madheedh ma waxaa laga xukumaa meel kale waayo wax alaala wax loo qabtay intii xukuumadani jirtay gobolkaa daad madheedh majiro haba yaraatee wax horumaroo ka muuqdaana ma jiro.

Waxaan soo jeedinayaa dugsigaa hala raaciyo dugsiyada miisaaniyada wax looga qoondeeyo, hadii meel kale laga xukumayana hanaloo sheego xaq baanuna u leenahey arrintaas.

Halkan saxaafada in lacagtaa ugu jirta inkastoo ay ku magacaaban tahay urur qudha oo SOLJA la yidhaahdo waxaa la leeyahay waxaa lagu dhisayaa dugsi saxaafadeed, dugsi saxaafadeedna wadankeenu wuu u baahan yahay waxaan leeyahay magacaa soljana halaga daayo waa muhiim meel saxaafadu inoga soo baxdo inaynu yeelanaa dugsigaana halagu hirgaliyo dugsiga saxaafada Somaliland markaa miisaaniyada guddida dhaqaaluhu tidhi waanu ka saarnay mudanayaal yaan laga saarine haloogu soo caliyo dugsigaana sidaa magaca guud ee saxaafada Somaliland isagoo wata lacagta haloogu daro, wasaalaama calaykum.

***<u>Xidhitaankii:-</u>***

**Gudoomiyaha:-** Wuu mahadsan xidhibaanku, xidhibaanada dooda u dhabar adeygay ilaa saacadan aad baanu ugu mahadnaqayaa, doodii Miisaaniyadu sidaasay ku dhamaatey, Sabtidana fadhigii waa fasax sanadka cusub dartiid oo jimce ayuu sanadku bilaabmayaa marka fasixii sanadka cusub sabtideynu qaadaneynaa, waa inoo axad iyo fadhiga xiga. Fadhiguna wuu xidhan yahay.

***(The speaker adjourned the setting until Sunday 03 January setting 21nd)***

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
---------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
------------------------------------------